

Xarunta QM  
ee  
Deegaamaynta  
Aadanaha  
(HABITAT)

# **Xubinta G/Degaanku markuu yahay Siyaasad-dejiye**

**Tilmaame-baraha 2aad**

**Tababarka Hoggaanka la soo doorto**

**Tarjumaddii: Jaamicadda Hargeysa**

Xubinta  
G/Degaanku  
Markuu yahay  
Siyaasad-  
dejiye

Taxanaha  
Agabka  
Tababarka

**Istanbuul, 1996kii-“Shir-madaxeedkii Caasimadaha”**

**Sawirrada waxa iska leh Joel Elord,  
Naqshadaha iyo jaan-goynta na Vicki Gillette**

**Xubinta  
G/Degaanku  
markuu yahay  
Siyaasad-  
dejiye**

**Tababarka  
Hoggaanka  
la soo doorto**

**ii**

**HS/708/04SO**

Sida ay muujisay natiijooyinka qiimaynta baahiyaha tababarka ee ay qabatay Xarunta QM ee Deegaamaynta Aadanaha (Habitat), baahiyaha tababarka ee khuseeya xubnaha golaha deegaanka la soo doortay ee Dawladaha Hoose, amase siyaasiyiinta heer degmo, waxa loo arkaa inay ku jiraan arrimaha caalam ahaan ugu muhiimsan, isla markaana, ugu danaynta yar dhinacyada dhismaha wax-qabadka ee horumarka Dawladaha Hoose iyo maamulkeeda.

Sannadihii ugu danbeeyey, tiro dalal kala duwan ah, sida Nepal iyo Poland ama Uganda iyo Paruguay ayaa ku tallaabsaday markii ugu horreysay muddo tobannaan sano ah, meelaha qaarna weligood, hawsha doorashada xubnahooda Golayaasha Degaanka iyo Duqayda magaaloooyinka. Baahiyaha tababarka ee madaxda la soo doorto ee Dawladda Hoose waxay xagga sare uga jiraan ajendaha dimoqraadiyadaha dawladaha hoosa ee cagaha loo taagay/dhismay, sida Ecuador, India iyo dalka Marykanka (USA).

Si wax looga qabto baahiyahan, Xarunta QM ee Deegaamaynta Aadanaha (HABITAT) waxay samaysay oo ay tijaabisay taxanayaal buugaag Tilmaame-barayaal ah oo tababarka ku lug leh si ay uga taageeraan Xubnaha Golaha Degaanka in ay matalaan muwaadiniinta, siiyaan hoggaaminta loo baahan yahay magaalo iyo dad ahaanba, si hawl-karnimo leh ula shaqeeyaan Dawladda Dhexe iyo maamulka, farsamo-yaqaannada iyo xirfadlayaasha sare ee shaqaalaha Dawladda Hoose iyo hay'adaha la hal-maala. Tilmaame-barayaashani waxay soo koobayaan siyaasad iyo go'aan-qaadasho, xiriirka, gorgortan iyo hoggaamin, ka-qayb-gelidda, agaasinka iyo hagidda shiraraka, xilalka karti-gelineed iyo fududeyneed ee xubinta Golaha Degaanka, maamulka maaliyadeed iyo arrimaha kale ee la hal-maala.

Tilmaame-barahan, Xubinta Golaha Degaanku markuu yahay siyaasad-dejiye, wuxu ka mid yahay taxanayaal 12 ah, looguna talogalay, bilow ahaan, in ay adeegsadaan tababarayaasha hay'adaha tababarka qaranka ee Dawladda Hoose amase waaxaha tababarka ee ku dhex yaal Dawladaha Hoose. Si ay ugu noqoto taageero dheeraad ah tababarayaasha adeegsanaya Tilmaame-barayaashan, Xarunta QM ee Deegaamaynta Aadanuhu (HABITAT) waxa kale oo ay soo daabacday buug kale oo kaabaya ama wehel u ah taxanahan Tilmaame-barayaasha ah. Buuggan la yiraah "Tusaha Tababaraha ee Tababarka Saraakiisha la soo doorto" oo ka kooban qoraallo tababaraha khuseeya iyo macluumaadba, waxa loogu talo-galay in tababaruhu uga faa'iidaysto qorshaynta aqoon-is-weydaarsiyada Saraakiisha la soo doortay ee ku salaysan Tilmaame-barayaashan.

Waxaa la filayaa in Tilmaame-barayaashani si weyn wax uga tari doonaan xoojinta dhismaha awoodda wax -qabad ee Dawladaha Hoose iyadoo la barayo ku dhaqanka hoggaaminta wacan, kuwaas oo ka mid ahaa ujeedooyinkii waaweynaa ee 1996dii Shirweynihii Xarunta QM ee Deegaamaynta Aadanaha, Habitat II.

Waxaan u mahad-naqayaana Dr. Fred Fisher iyo Mudane David W.Tees kaalintii ay ka qaateen diyaarinta Tilmaame-barayaashan iyo kuwo kale oo ku jira taxanayaashan, iyaga oo la kaashaday shaqaalaha Xarunta QM ee Deegaamaynta Aadanaha (HABITAT) Qaybta Tababrka ee ka tirsan isla Xarunta QM oo ay taageero u fidisay Dawladda Netherlands. Waxa kale oo aan rabaa in aan xuso talooyinkii iyo tilmaamihii ay ku darsadeen Tabarayaasha iyo madaxda Dawladda Hoose ee Costa Rica, El Salvador, Kenya, Lithuania, Romania iyo Uganda ee naga caawiyay tijaabintii goobeed ee Tilmaame-barayaashan.

Dr. Wally N'Dow  
Kaaliyaha Xoghayaha -Guud  
Xarunta Qaramada Midoobay ee  
Deegaamaynta Aadanaha (Habitat)

**Xubinta  
G/Degaanku  
markuu yahay  
Siyaasad-  
dejiye**

**Tababarka  
Hoggaanka La  
soo doorto**

iii

Tarjumadda iyo habaynta af Soomaaliga ah ee Tilmaame-barayaasha Hoggaanka la soo doortay waxay ku hirgashay Barnaamajka Is-maamulka Fiican iyo Tababarka Hoggaanka la soo doortay ee ay maal-gelisay EU-da, isla markaana uu fuliyay Xafiis Goboleedka UN-HABITAT ee Afrika iyo Dalalka Carbeed.

Tarjumadda iyo habaynta af Soomaaliga ah ee Tilmaame-barayaashan Tababarka Hoggaanka la soo doortay, waxa ka hawl-galay koox tarjumi dda ku xeel dheer oo ka tirsan: Akaademiga Nabadda iyo Horumarka, Jaamicadda Hargeysa iyo Jaamicadda Cammuud; iyaga oo ay ka caawisay Hay'adda QM ee HABITAT, laanteeda Hargeysa ku taal.

Mahad-naq gaar ah waxa mudan Akaademiga Nabadda iyo Horumarka oo ka hawl-gashay tifaf-tirka iyo isu-ekeysiiinta Tilmaame-barayaashan.

Waxa kale oo mahad-naq mudan Jacfar Maxamed Gaaddaweyne oo Akaademiga Nabadda iyo Horumarka ee Somaliland ka tirsan, Maxamed Muumin oo Jaamicadda Bariga Afrika ee Puntland ka tirsan iyo Maxamed Afrax oo Xarunta Cilmi-baadhista iyo Dood-wadaagga ee Koonfurta-Dhexe ee Soomaaliya ka tirsan, kuwaas oo wada diyaariyay tarjumadda ereyada Ingiriisiga ah ee Tilmaame-barayaashan ku jira.

Mahad-naq gaar ah waxa isna mudan Maciej Sudra oo diyaariyay astaamaha iyo naqshadaha jaldiyada Tilmaame-barayaashan.

**Xubintas  
G/Degaanku  
markuu yaha  
Siyaasad-  
dejiye**

**Tababarka  
Hoggaanka  
La soo doorto**

**iv**

## Koofiyadda

Koofiyadda oo uu gashan yahay Sawirka Midigta inaga xiga kuna muuqandoona bogaga soo socda si ay tusaale ugu noqdaan dhowrka xubineed ee buugga n ku muuqan doona.

**Koofiyadda****HALKA UU KAGA JIRO TILMAAME-BARAHAN**

		<b>Bogga</b>
Koofiyadda oo uu gashan yahay Sawirka Midigta inaga xiga kuna muuqandoona bogaga soo socda si ay tusaale ugu noqdaan dhowrka xubineed ee buugga n ku muuqan doona.	Sida loo isticmaalayo Tilmaame-barahan <b>Qaybta 1aad:</b> Xubinta Golaha Degaanku markuu yahay Siyaasad-dejiye  Qeexid Soo-ururin Milicsi Aragtiyaha iyo Fikradaha  Ka-hor-deggidda dejinta siyaasadda Yaa ku hawlan dejinta siyaasadda  Milicsi Kala doorashada dooddaha Siyaadadeed Fududeeyaha siyaasadda Qodobbada Muhiimka ah Raad-raac	vii   1  2 2 2 3  4   11 11 14 17 18
<b>Xubinta G/Degaanku markuu yahay Siyaasad-dejiye</b>	<b>Qaybta 2aad:</b> Aqoon Is-weydaarsi - Xubinta G/Degaanku markuu yahay Siyaasad-dejiye  Dulmar Guud	   19  20
<b>Tababarka Hoggaanka</b>	2.1 Layli diyaar-garow: Xusuusta siyaasadeed 2.2 Layli: Halxiraalaha Siyaasad-dejiyaha 2.3 Bandhigga Tababaraha 2.4 Daraasad-xaaladeed: Qorshaha Maaraynta Qashinka ee	22 24 28
<b>La soo doorto</b>	Caraweelo 2.5 Layli: Tijaabo xirfadeed 2.6 Layli: Gudbin xirfadeed	29 32 34
<b>vi</b>		

|

## Sida loo isticmaalayo Tilmaame-barahan

Tilmaame-barahan Tababarka ee XUBINTA GOLAHA DEGAANKU MARKUU YAHAY MAS'UUL SIYAASAD-DEJIYE, sida Tilmaame-barayaasha kale ee taxanahan, waxa loo isticmaali karaa siyaabo badan.

Qormada Tilmaame-barahani ku bilaabmayo waxa loogu talo-galay in aad iskaa wax ugu baratid. Waxa keliya ee aad u baahan tahay waa meel deggan oo aad ku fekertid, waqti iyo warqado aad wax ku qortid. Si aad u hesho natiijooyinka ugu fiican, waxaanu kugu dhiirri-gelinaynaa in aad qorto jawaabaha su'aalaha ka dhasha qormada. Qiimaha barashada ee akhristaha tubtan raaca ayaa laban-laabanta.

## Tababarka aqoon-is-weydaarsiga

Qoraallada Tababaraha iyo agabka layliga ee Tilmaame-barayaasha waxa loogu talo-galay in ay adeegsadaan tababarayaasha waayo-aragga ahi marka ay wadaan aqoon-is-weydaarsiyada tababarrada ee Xubnaha Dawladda Hoose oo kala duwan. Agabka casharada iyo layliyada tababaraha ee buuggan loogu talo galay in ay isticmaalaan tababarayaasha waaya-araga ah ee aqoon isweydaarsigan tababarka ah ee xubnaha dawladda hoose ee kala duwan. Waxa ku jira qaabab waxbarasho oo kala duwan iyo habab tababarayaasha u suura gelin kara inay waafajiyaan aqoon isweydaarsiga duruufaha u gaarka ah xubnaha.

Ujeedooyinka buuggan loo qoray waxa ay kugu dhiirigalinayaan in aad ku biiriso waayo-aragnimadaada tababarenimo si aad sare ugu qaado agabyada tababarka ee xubnaha dawladda hoose.

Tababarow waxa aad dooran kartaa in aad sidiisa u raacdo agabka buuggan taxanaha ah uu u yaalo. Haddiise aad ka door biddo waad kala hormarsan kartaa ama waxbaad ka bedeli kartaa haddii loo baahdo si loo gaaro ujeedooyinka iyo xaaladaha u gaarka ah tababar kasta.

Waxa aad dooran kartaa tababar saddex saacadood ah adiga oo isticmaalaya layliyada buuggan. Ama waxa aad ka faa'iideysan kartaa agabyada badan ee buuggan adiga oo ku biirsanaya waayo aragnimadaada si aad uga dhigato tababar maalin dhan socda.

Tilmaame-barahani wuxu ka mid yahay 12 Tilmaame-bare oo taxane ah oo lagu tababaro hoggaamiyayaasha la soo doortay. Waxa aad dooran kartaa ama lagaa codsan karaa in aad qabato aqoon isweydaarsi kaaga baahan in aad isticmaasho dhawr buug ama dhammaantood oo mudo dheer soconaya. Walow buug kasta loo isticmaali karo gaar ahaantii, hadana waxtarkooda iyo ka faa'iideysigooda waxa uu ka badan yahay marka taxanaha oo dhan ay qaataan xubnaha dawladda hoose.

**Xubinta  
G/Degaanku  
markuu yahay  
Siyaasad-  
dejiye**

**Tababarka  
Hoggaanka La  
soo doorto**

**vii**

### **Tababar-kooxeedka:**

Marka la helo tababare xirfad iyo waayo-aragnimo leh, tilmaame-barahan waxa kale oo loo isticmaalayaa si ay u kordhiyaan wax-qabadka iyo aqoonta xubnaha meel ka wada shaqeeya. Xubnaha meel ka wada shaqeeya, waxa la rumeysan yahay tababaruhu in uu hawlaha tababarrada ee buuggan uu soo diyaariyo una habeeyo in uu ku daro wax dheeraad ah isaga oo tixgalinaya duruufaha iyo sifooyinka kooxda la tababarayo. Waxa la rajeynayaa xaaladaha noocan ah in loo arko buuggan in uu yahay agab adeeg oo ay ku jiraan habab tababar oo kala duwan oo la isku barxi karo, la iswaafajin karo, wax lagu dari karo lagana saari karo hadba sida ugu haboon.

Waxa aad haysataa fursad aad ku kala dooranayso noocyada tababarada buuggan. Waxa lagu rajo weyn yahay in aad sida ugu fiican uga faa'iideysato.

**Qormo**

## **QAYBTA 1aad**

**Qormo**

### **Xubinta Golaha Deegaanku markuu yahay Siyaasad-dejiye**

**Xubinta  
G/Deegaanku  
markuu yaha  
Siyaasad-  
dejiye**

**Tababarka  
Hoggaanka  
La soo doorto**

## Qeexid

Xubinta golaha deegaanka oo siyaasad dejiye ah, waxa uu ku hawlan yahay dejinta himilooyinka, eegista doorashooyin kala duwan, go'aaminta qorshayaasha hagi doona wax qabadka hadda iyo kuwa soo socda ee bulshada waxtarka u leh.

## Soo-ururin

Qoraalkan gaabani wuxuu qeexayaa siyaabo badan oo dawladaha hoose ay u go'aamiyaan siyaasadda iyo habraacyada si wanaagsan loogu maamuli lahaa.

Waxaynu eeggi doonaa sida ay u kala duwan yihiin: siyaasad, higsii, iyo istaratijiyada lagu fulinayo. Waxaynu sahamin doonaa sida golayaasha qaarkood u dejiyaan go'aamada bulshada, habraaca siyaasad dejinta ay uga dhigaan kuwo faahfaahsan oo wax-ku-ool ah. Guud ahaan waxaynu iftiimin doonaa kaalinta qof waliba uu qaatay, laakiin ay in yari fahamtay.

## Milicsi

Marka aan qof ahaan u fekeri anigoo siyaasad dejiye ah, wax yaabahan soo socda ayaan ku fekeraa.

1. \_\_\_\_\_  
\_\_\_\_\_  
\_\_\_\_\_
2. \_\_\_\_\_  
\_\_\_\_\_  
\_\_\_\_\_
3. \_\_\_\_\_  
\_\_\_\_\_  
\_\_\_\_\_
4. \_\_\_\_\_  
\_\_\_\_\_  
\_\_\_\_\_

**Xubinta  
G/Degaanku  
markuu yaha  
Siyaasad-  
dejiye**

**Tababarka  
Hoggaanka La  
soo doorto**

## Aragtiyaha iyo Fekradaha

Siyaasaddu waa erey macnayaal badan leh. Waxay noqon kartaa:

- a) Fahamka dabeecadda ama mowqifka mabda'a ah;
- b) Qorshe hagaya jihada mustaqbalka loo socdo.
- c) Qeexid waxa markaa socda.
- d) Soo-bandhig fikradeed.
- e) Hab loogu dhawaaqo go'aammada dowladda.
- f) Awoodda rasmiga ah.
- g) Mowqif laga dooday oo laba dhinac ama in ka badani isla gaareen.
- h) Oraah ujeedo leh.
- i) Run aan loo jeedin ama aan lagu dhawaaqin, oo aan waligeedba si rasmi ah cidina u go'aamin oo ay ku jiraan kuwa loo haysto inay siyaasad dejintu tahay doorkooda.

Badiba, waxa jira in siyaasaddu ka dhalato hanaan go'aan qaadasho oo ay si weyn uga fekereen kooxaha ama qaybaha siyaasadda iyaga oo ku salaynaya falanqayn

buuxda oo ay ku fiirinayaan duruufaha ku wareegsan ama la xiriira marba xaaladda markaa taagan iyada oo ay tixgelinayaan siyaabaha suuragalka ah ee wax lagu sii hagaajin karo. Dhab ahaan, hannaanka siyaasaddu waa wax aan kala soocnayn. Mararka qaarkood waxay u dhacdaa sida oraahda kore tilmaamayso marar kalena waxay si talaabo talaabo ah ugu dhalataa doodaha axsaabta wada tashada. Tusaale ahaan, xaaladaha ka horeeya heshiis amaahood oo lala galayo deyn bixiyayaasha oo lagu dhisayo warshad biyood oo cusub.

Siyaadadaha waxa la dejiyaa ama mar danbe lagu dhawaaqaa wakhtiga Qorshe-miisaaniyadeed ay golayaashu qoondeeyaan sanadka cusub.

### Xubinta

### G/Degaanku

### markuu yaha Siyaasad- dejiye

### Tababarka Hoggaanka

### La soo doorto

3

Siyaasaduhu waxay ka soo bixi karaan xaalado aan loo jeedin. Tusaale ahaan, goluhu wuxu ku shaqeynayaa qorshe-miisaaniyadeed ciriiriya, wuxuuna markaa goluhu iska dhaafaa ama ka hortegaa kharashaadka dayactirka agabka joogtada ah iyo kan hantida maguurtada ah. Dhawr sanno oo la iska dhaafayay masuuliyada kharashka dayactirka, shaqaaluhu waxay go'aansadaan in aan lagu darin qorshaha dalabyada miisaaniyad dambe. Sidaa awgeed, ayuu goluhu waxa uu socodsiiyaa siyaasad dayactir la'aan ah oo aan lagu talo gelin.

Mararka qaarkood waxa siyaasadda dejiya qabqablayaasha suuqa oo wax qabadkooda ama wax qabad la'aantoodu tahay ta qeexda siyaasadda dowlada hoose ee ku saabsan mashruuc gaar ah ama shaqo gaar ah. Golaha degmo waxa laga yaabaa inuu sameeyo siyaasad qeexaysa heer shaqo gaar ah oo ay tahay in laga helo bulshada aanse weligeed fulin, sababtu wax kasta ha haatee. Waa kuma

xaajadan oo kale, kan run ahaan dejiyey siyaasadda?

Sida aad arki kartid, siyaasad dejinta taxanaha ah waxay noqon kartaa wax adag oo aan mar walba hoos iman golaha oo loo arko ka uu doorkiisu yahay ka siyaasadda dejiya.

**Ka-hor-degidda dejinta siyaasadda:**

Xubno gole ahaan waxaad tihiin siyaasad dejiyaasha bulshadiina. Hadana waxay u muuqataa in siyaasadaha ay badiba dejiyaan dhawr qof oo kala duwan ama kooxo ama xaaladaha markaa jira oo ka baxsan talooyinka gole ahaaneed. Mararka qaarkood way adag tahay inaad hogaamiso iyada oo ay tahay shaqooyinka la og yahay inay adiga ay ka yihiin awoodaada gaar ahaaneyd, sida siyaasad dejinta oo kale. Kumaa run ahaantii dejiyey siyaasadda? Adiga oo ah madax la doortay, waxa ku niyad jebin kara marka aad aragtid wax yaabihii awoodaada saldhig u ahaa oo xoogag kaa badani hadba in goosanayaan.

Tusaale ahaan, waxa dhici karta in hay'adaha lacag bixiyayaashu ku adkeystaan shuruudo u gaara

ka hor inta aanay deynta ogalaan. Ama shaqaalaha dawladda Hoose aanay fulin mid ama dhowr siyaasadahaagii ah, taas oo macnaheedu yahay dib u qorid siyaasadahaagii iyadoo lagu bedelayo hawlo ku liddi ah. Maxay tahay inuu gole sameeyo xaaladahan oo kale? Ugu horeyn waxay ku xidhan tahay xaaladaha taagan. Markay siyaasadi ka tarjumayso isku-dayo mac-hadyo is kaashanaya; sida marka aad la macaamilayso hayado shisheeye; wey yar tahay waxaad ka qaban kartaa, siiba haddii aad damacdo inaad u muuqato qof awood leh. Marar kalena waxa haboon inaad la wadaagto siyaasad goynta. Arrintu ma ahan mid ay hay'adi awoodaadii

ku soo xad-gudubtay, laakiin waxay tahay waa maxay mawqifka aad siyaasad ahaan ku doodi kartaa, adigoo ka duulaya xaaladda jirta. Xaaladan oo kale markay kula kulanto waa waqtigii aad door dhexdhexaadin qaadan lahayd.

Hadii aad u fahamtid in shaqaalaha dawladda hoose aanay fulinayn mid ka mid ah siyaasadahaaga sidii aad ugu talogashay

ayse u muqato inay doonayaan inay wax kal bedelaan siyaasaddii oo ay ku bedelaan Waxqabad ka qabadkood ama wax qabad la'aantooda, waxa dhaci karta in sababa kala duwani

jiraan. Duruufo sidoo kale ah waxa lagu cadeyn karaa ama lagu hagaajin karaa golaha

Dabagalka deegaanka oo samaynaya faragelinta loo baahan karo.

Waxa jira daruufo badan oo kale oo ku tusi kara in adiga iyo saaxiibadaa aydaan si buuxda gacanta ugu haynin talada markay noqoto dejinta siyaasadda ee bulshada. Waxaana dhici karta in taasi haboon tahay. Looma baahna in dawladda hoose ay dhex gasho dhinac kasta oo bulshada nolosheeda ah. Dhinaca kale marka laga eego waxa laga yaabaa inaad dowladda aad kaga qeyb qaadanaysid siyaasad dejinta aanay cuslayn kana degi kartid hogaanka markii loo baahdo. Hogaamintu, marka la eego xagga siyaasadda, waa mid ka mid ah dowladda ugu adag haddii laguugu yeero inaad ku shaqeysid adoo xubin la doortay ah.

**Xubinta  
G/Degaanku**

**markuu yaha**

**Siyaasad-  
dejiye**

**Tababarka  
Hoggaanka  
La  
soo doorto**

Waxaa laga yaabaa inaad qaadatid mowqif aanay la socon  
dadkii ku soo doortay ama ay diidan yihiin saxiibbadaada golaha kugula jira.

(waxa laga yaabaa inaad dib u xusuusatid sida ay u ekeyd bilowgii illaa haddana  
bulshooyinka qaarkood ay weli ku adagtayahay inay qirtaan dhibaata TB-da ama

## Qormo

keenaan siyaasado lagu hakinayo cudurkan. Ama waxa kala oo muuqan karta in caado in badan soo taagneyd oo bulsho haysato oo hortaagan horumarinta dhaqaalaha, ayse ku dhici waayeen golayaashii hore in ay u bareeraan baahidan ah in labadelo.

***Caadadu waa hage, ee ma aha xabsi.***

Guddoomiyaha golaha magaalada yar oo Texas ah oo ku taal maraykanka mar la weyddiiyey waayo aragnimadiisa shaqo ee dowladda hoose, wuxuu yiri “waa inaad leedahay waxaad rumeysan tahay. Haddii qof kasta uu aado dhinaca uu doono, waa inaad tiraahdaa, “hal daqiiqo sug, taasi macno badan samayn mayso.” Waa inaad kartaa inaad istaagtid oo aad tiraahdid sidaas. Waxaan ogaaday in dadku kugu qadarinayaan in aad runta ka sheegto waxa aad rumaysan tahay. Dadkaasi waa kuwa leh astaamaha hogaamineed”

Hore umay dhicin inay Dowladaha hoose ka hortimaado qaadashada dowladaha hogaamineed ee siyaasadeed qaranka. Laba u ololeeya dowladaha hoose, mid ka mid ahi waa maamule magaalada weyn. Kan kalena waa la taliye-maamul, ayaa waxay dhawaan soo saareen qoraal muujinaya caqabadda ku saabsan “Xaqiiqooyinka siyaasadeed ee soo ifbaxaya qarniga 21aad.”

Dib u qeexid balaaran oo ku saabsan sida dowladda hoose gaar ahaan kuwa magaaloooyinka waa weyn ay tahay inay u shaqaeeyaan iyo sida ugu haboon ee ay tahay in qarniga 21aad bulshada loo gaarsiiyo adeegyada assaasiga ah. Horumarinta dhaqaalaha, qorshe iyo dhibaataada koritaanka, dayactirka iyo fidinta kaabayaasha, qabashada adeegyo taya iyo raaxaba leh, buuxin karta baahida aad u kordheysa ee bulshanimada iyo rabitaanka dadka ee adeegyada, iyo gaaritaanka waxa bulsha kastaa u baahantay ayaa ah wax yaabaha ugu culus ee hortaagan dowladaha hoose dib ugu taabtaan awoodahooda wax-curineed iyo hantiyeed si ay wax uga qabtaan arrimaha hortaagan.

Isla qolooyinka doodda wadaa waxay tilmaameen in habkii wax ka qabadka dhibaatooyinka iyo baahidu uu ahaa mid meel dhexe laga maamulayo, waxayna awoodi waayeen inay soo saaraan habab cusub oo ka jawaabaya baahida ay qabaan dadka kala duwan ee ku dhaqan magaaloooyinka.

**Xubinta  
G/Degaanku  
markuu yaha  
Siyaasad-  
dejiye**

**Tababarka  
Hoggaanka  
La  
soo doorto**

## Qormo

Dhibaatooyinku way kordhayaan, dakhliga dowladaha hoosana way yaraanayaan (marka loo eego baahida). Waxa loo baahan yahay siyaabo cusub oo wax lagaga qaban karo dhibaatooyinka bulshada.

Siyaasaduhu waa hab loo maro jihooyin cusub oo ay qaadan karto dowladda hoose si ay uga jawaabto caqabadaha iman kara iyo kuwa hada jira, iyadoo lagu wajahayo xalal loo dhanyahay.

Siyaasad dejintu waa wax af wax jara leh, marka aad istidhaahdid dhibatooyinka Manta berri u dhigo kuwa berina iskaga fogow intaanay sooba if bixin. Soo jeedinaha siyaasadu badanaaba waa oraahyo qeexaya waxayaabaha kolba cusub ee aragtida ku saabsan dawladda hoose iyo dowladda, waa dariiq lagu cadaynayo waxyaabaha soo

baxaya ee la qiimeeyo. Waa hab aad siyaabo badan u kala dooran kartid ugana baraan degi karaan qaybaha danaha kala duwan leh ee bulshada.

### Hadafyada>Siyaasadaha> istaraatejiyadaha

Dowladda siyaasad dejiye waxay qaabaysaa fursadda mustaqbalka wax loogu qabanaayo

bulshadaada iyo in la hubiyo in barnaamijyada iyo adeegyada muhiimka u ah bulshada inay ka horeeyaan kuwa laga muhiimsan yahay. Siyaasaddu waxay ina tustaa waxa dawladdaadu ka qabato dhibaatooyinka bulshada markaa haysta. Siyaasaddaha waxaa badanaaba lagu qeexaa “oraahyo ku talagal xambaarsan”. Hase yeeshee ku talagalku had iyo jeer ficil ahaan uma dhacaan ama natiijadii looga baahnaana kama soo baxdo.

Waxyaabaha mudan in laga fekerro marka la dejinayo siyaasadda waa jihada iyo natiijada.

Intaynaan halkaa sii dhaafin waxaa wax ina tari kara haddii aynu qeexno erayo la xiriira habka dejinta siyaasadda.

### Hadafyadu:

Waa oraahyo tilmaamaya waxyaabaha la doonayo mustaqbalka ee mudan in bulshadu awood geliso kana rumayso. Waxayna kala yihiin:-

**Xubinta  
G/Degaanku  
markuu yaha  
Siyaasad-  
dejiye**

1. Waxyaabaha tusinaya ujeedooyinka asaasiga u ah bulshada,
2. Indho-ku-haynta natiijada, ma ahan oo keliya qabashada Shaqooyin gaar ah iyo dhameystirka shaqo la isku xilsaaray; iyo
3. Helista ballan-qaad adag oo dad iyo hanti ah si loo helo ujeedooyinkaas,

**Tababarka  
Hoggaanka**

### Siyaasaddu

waa go'aan uu qaato gole si uu u taageero fulinta ujeedooyinka. Waxay kale oo yihiin oraahyo ku talagal xambaarsan. Waxay ku qeexaan waxa golaha

**La  
soo doorto**

**6**

degaanku rabo inuu qabto. Marka sidan loo eego ma ahan siyaasaddu mid si aan loo fileyn iskaga timid. Waxayse yihiin ficilooyin ula kac ah oo ay ku kaceen kuwa xilka iyo go'aan qaadashada leh, oo saaraysa natiijooyin la saadaalin karo.

Siyaasaddahu waxay sameeyeen hadafyo sharci ku dhisan waxayna fasaxaan marinada

waxqabad ee dowladdaha hoose. Waxay inoo hogaamiyaan horumarinta jidka fulinta hadafyada.

Istaraatejiyaduhu waa siyaabaha keena guusha lagu gaari karo ujeedooyinka iyo siyaasadaha. Istaraatejiyaddu waa inay ka kooban tahay jidad aad kala dooratid oo

## Qormo

aad ku fulin kartid barnaamijyadaada iyo mashaariicdaada. Waa inay ka fekeraan ku dhaqanka tababarka aan ku xukuumad ahayn, iyagoo isticmaalaya kuwa gaarka ah, kuwa aan macaashdoonka ahayn, iyo ururrada bulshada.

Erayadani waa qaar siyaabo badan loo sheegi karo, sidaa darteed waa inaan sugitaankooda macne ina xannibin. Waxaa muhiimka ah waxaa waaye sida dhacdooyinka isugu xigaan iyo meesha ay siyasad dejintu ku haboon tahay inay ka gasho. Kolka hore waxaa yimaada dareynka wax yaabaha loo baahan yahay in la qabto, dabadeedna aragteeda ah maxaa laga qaban karaa horumarinta bulshada. Tani ma aha xil adiga ku saran xubin gola deegaan ahaan. Si kasta ha ahaatee, adiga iyo saaxiibadaada golaha ku jira ayay tahay in laga helo hogaanka. Mawqifkaaga, kan golaha iyo waxaa doonaysid inaad qorsha ahaan qabtaaa waxay ka dhashaan dareenka, aragtida rabitaanka iyo balanqaadka.

Oraahyadan na tusinaysa mowqifka waxaa la yiraahdaa waa ujeedooyin ama waa siyaasado. Inkasta oo ay golaashu qaarkood ay jecel yihiin in aanay mowqifkooda qoraal ku muujin. Halka, mowqifka aan cadeynin uu sababi karo inaad isbedeli karto, hadana waxay taasi abuurtaa in shaqaalaha dawladda hoose ee xilka fulint ujeedooyinka iyo siyaasadaha hayaa ay qalqaliyaan oo fahmi waayaan, muwaadiniinta kalana mad madow kaga riddo ujeedooyinkaaga.

### Tusaale

Waxaad ka soo qaadaa inaad tahay xubin ka mid golaha deegaanka ee degmo miyi ah.

- Boqolkiiba labatan ayaa dadka deggan degmada ayaa si aan dhibaato ugu jirin heli kara biyo la cabi karo. (dhibaato).
- Iyaga oo dib u eegaya dhibaataada, ayaa goluhu go'aansaday in boqolkii shan iyo sagaashan (95) helaan dadka degmada deggani biyo la cabi karo oo aan ka fogeyn hal kilo miter meesha ay deggan yihiin marka taariikhdu tahay 2000. (ujeedo) (goals).
- 
- Mar hadii aan degmadu haysanin lacag ay ku dhisto qalabka loo baahan yahay si ujeedadan loo gaaro, waxay aqbaleen sharci cadeynaya dowladda fududeynta ah o goluhu la qaban doono muwaadiniinta si ay iyagu u hormariyaan ama u samayaan meesha ay biyo lacabi karo ka helayaan. Sharcigan waxa kale uu na tusayaa in ciqaab la gaarsiin wakhti cayiman kadib haddii muwaadiniin ayna isticmaalayaan biyaha wanaagsan meelaha laga helayo ee loo doortay inay yihin meelaha biayha wanaagsan. (siyaasad) (policy).
- 
- Waxa goluhu si buuxda u qorsheeyey, waxa uu la qaban lahaa muwaadiniinta marka siyaasadan la fulinayo. Dowladda hoose waxay la qabanaysaa muwaadiniinta samaynta gudiyo, bixinta tababar, helitaanak deyn mudada dheer ee lagu horumarinaayo meelaha biyaha laga helaayo; bixinta kormeerista marka la dhisaayo meelaha biyaha iyo kadib si loo hubiyo in waxyaabahaasi noqdaan heerka la doonayo. (hirkelin ujeedooyinka – strategy)


**Xubinta  
G/Degaanku  
markuu yaha  
Siyaasad-  
dejiye**

**Tababarka  
Hoggaanka  
La  
soo doorto**


**Qormo**

Waxba kama aynaan sheegin “ujeedooyinka”, “wax soo saarka”, “waxayaabaha ka soo baxa”, “natiijooyinka” laakiin waxaynu filaynaa inaan aburnay qalqal iyada oo aanaan kordhin ereyada. Mar labaad hadeynu ku celino, dejinta ujeedo waa hab lagu gaarayo Jihada bulshada mustaqbalka qaadi doonto si ay baahidooda u gaarto, mustaqbalkana aragti u yeelato. Siyaasaduhu waa meesha la taagan yahay ee loo baahanyahay si u jeedooyinku u socdaan. Hirgelin ahaanna waxaad go’amineysaa sidii qorshahaaga aad u socodsiiin lahayd illaa dhamaystirka, adoo gaaraya natiijadii aad oraahdaada ujeedadaada aad ku sheegtay iyo halkii aad siyaasad ahaan taagneyd.

**Habka Istaraatiijiyadda Maamulka**



**Muunad Staratiiji**



**Xubinta G/Degaanku markuu yaha Siyaasad-dejiye**

**Tababarka Hoggaanka La soo doorto**

## Qormo

### Yaa ku hawlan dejinta Siyaasadda

Inkasta oo dejinta siyaasaddu ay gacanta ugu jirto wakiillada xafiiska loo doortay, hanaanka

dooda siyaasadda iyo wax ku darida hannaanka siyaasada waxay tahay ama waa in ay noqoto mid baahsan. Ugu horeyn, waxaa la faliyaa in adigu xubin gole deegaan ahaan, in aad gudato dooraada ah in aad qabato dooda siyaasadeed ee bulshada, markaa adigaa noqoya qofka xogta bulshada dhaxmarayso waxadna joogtaa meel aad ku dari karto feker ay kula qaadan karaan golahaada iyo bulshadaada. Samaynta siyaasad wax tar leh waxay ka bilaabataa qoraalada cabashooyinka ama ama caro ka muuqato oo ay yidhaahdaan wakiillada siyaasaddu oo ama qab aragti is beddel, ama wakiil ka ah ra'yiga ay waxyaabaha qaarkood ay ka qabaan meelahii laga soo doortay.

Mararka qaarkood fekeradaha siyaasaddu waxay ka yimaadaan dadka tirsan kuwa wax doorta oo ka fekeraya dhibato ama howl markaa tagan oo bulshada guud ahaan qiime u leh. Markay ku hortimaado fikrad ka soo baxday qof ama koox ama urur, waxaa qiimo leh in la hubiyo intee in leeg ayaa dadku aqoonsan yahay dhibaataada intaadan noqon mid iyada u doodaya. Tani waa in aanay iska kaa hortaagin fikrada meel ka soo baxda, laakiin waxay ku tusaysaa inaad garatid inaad bulsho balaaran wakil ka tahay.

Meesha halkan ku xigta ee siyaasaddu ka imanaysa waa shaqaalaha golaha iyo dawladda hoose. Shaqsiyaadkaasi iyaga oo isku deyay inay fuliyaan siyaasadda golaha

, ayaa caqabado u gooni ah ay soo hordhigaan siyaabaha loo xoojin karo wax qabadka markaa soconaya ama in la sameeyo mushruuc lagaga jawaabay dhibaatooyinka jira. Badanaaba waxay leeyihiin waayo aragnimo shaqo iyo aqoon muhiim u ah samaynta wadooyin kala duwan oo ay kala dooran karaan hogaamada la soo doortay. Waxay kaloo yihiin qaybta ugu horesa ee u baahan inay ogaato siyaasadda la soo jeediyay ee ka imanaya golaha iyo bulshada.

Haddii goluhu aanay haynin waayo aragnimadii looga baahnaa shaqaalaha dawladda hoose, si ay uga fiirsadaan ama u sharraxaan soo jeeddinnada siyaasadeed, ama dhalin kara siyaabo ama jidad aad ka fekartid ama kala dooratid, waa inaad ka fekartaa siyaabo kale oo aad taageero farsamo ku heli lahayd.

### Xubinta G/Degaanku markuu yaha Siyaasad- dejiye

### Tababarka Hoggaanka La soo doorto

Meelaha aad ka heli kartid taageeradan waxaa ka mdi ah jaamacadaha, machadyada Cilmi baarista, xarumaha wada tashiga, kooxaha bulshada, iyo heerarka sare ee Dowladda ee waxyaabaha isku mid ah wadaagtaan.

Xaaldahaas oo dhan waxaa muhiim ah in la garto in halka wararku ka imanayaan ama

9

ka soo baxayaan iyo aqoonta dheeradka ahiba ay la imaan karaan dhan u xaglin marka doodu socoto.

Kartida waxqabad ee siyaasaduhu waxay ku xiran yihiin kolba taageerada ay ka helaan dadka ay saamaynayso. Taasi waxay sababaysaa in dhamaan qeybaha bulshada ay ka qeyb galaan doodaha marka siyaasadda la dajinayo.

Waxay kale oo la

yimaadaan eegis lagu hubinayo in siyaasadda aad soo bandhigaysaa tahay mid runta ku fadhida oo bulshadu ogoshahay marka ay geleyso heerka fulin ama kharash

soo celinta . tusaale ahaan waxaa laga yaabaa in golahaagu ka fakarayo nidaam lagu maareynaayo saxmada gaadiidka suuqa dhexe ee degmada taa soo ay ku jirto, in jidadka hal dhinac loo maro iyo shuruudo kale oo arintaas lagu xaliyo.

Waxa muhiim ah in fekradahaan la hordhigo ganacsatada, darawalada basaska iyo kuwa kalaba, si loo arko falcalintooda iyo wax ku darkoodaba.

Su'aalaha muhiimka ah ee la isku weydiin karo haddii la bilaabo siyaasad cusub ama haddii tii hore beddel ku dhaco waxa waaye:-

a) yaa caawinaya iyo sababta?

b) Yaa ka hor imaanaya iyo sababta?

Inaad ogaatid yaa siyaasadaada u olaleynaya iyo yaa diidan iyo sababaha ay u qaateen mowqifyada ay taagan yihiin, ayaa muhiim u ah fulinta iyo hirgalinta siyaasada.

Mararka qaarkood waxay dooda siyaasaddu ka dhex bilaabantaa bulshada ama haddii ay ka bilaabanto golaha waxay ka sii socotaa suuqyada. Isbeddellada ugu muhiimsan ee siayasadeed qaarkood ee heerka xukun degaan waxay ka bilaabantaa heer deris/xaafadeed. Golayaasha had iyo jeer ku guuleysta dejinta siyaasadda waa kuwa

xiriirka joogtada ah la leh shaqsiyaadka iyo kooxaha shaqada ka wada heer ugu hooseeya ee bulshada.

Ma aha oo keli ah guddi qiyaasta soo

jeedinta siyaasadaha cusub ee ay bilaabaan goluhu, waxay kale oo yihiin meel fekrado

badani ka dhalan karaan oo ku saabsan jihada ay tahay in dawladdu u socoto iyo illaalinta sida ay siyaasaddaha hadda ay baahida bulshada wax uga qabanayaan.

**Hadii aanay dabeyli jirin,  
toosi.**

**maahmaah Polish ah**

**Xubinta  
G/Degaanku  
markuu yaha  
Siyaasad-  
dejiye**

**Tababarka  
Hoggaanka  
La**

**soo doorto**

**10**





- Habka khubarada ee Siyaasadda,
- Talooyinka shaqaalaha Golaha,
- Is-dhex-galka shaqaalaha iyo Golaha,

## Qormo

- Siyaasadda debedda: Doodda siyaasadda,
- Doodda bulshada iyo **Golaha Degaanka**
- Waxayaabaha bulshadu bilowdo.

### **Baaritaan dadweyne oo sarreeya**

Habka khubarada ee siyaasadda. Golayaasha deegaanka ee magaaloyinka waa weyn qaarkood waxay qaateen habka qorshaha ee kombaniyada oo aad uga tiirsan qorshaha ay sameyaan qaybta xirfadlayaashu marka ay helaan macluumaadka iyo falanqaynta waxyaaba bulshadu danayso. Habkani waxaa baryahii danbe lagu ceebaynayey in aanu la socon waxa run ahaan ka dhex socda bulshada. Qaybahani waxay ku xiran yihiin macluumaadka tira ah iyo sameynta hab macquulka ee lagu kala dooranaya siyaasadda. Waxa laga yaabaa in aanay diidayn dooda iyo wada xaajoodka siyaasadeed, laakiin muhiim maaha inay macluumaadka u qaataan qaar ay u isticmaali karaan go'aan qaadashada maduddada dheer. Qorsheynta istaraatiijiyadeed ayaa si xun u shaqeysa, haddii ay ka shaqeeyso dhamaanteed, marka ay ku xiran tahay go'aaminta falanqaynta. Si loo guuleysto, qorshuhu waa in uu tixgeliyaa saameynta ay ka leeyihiin hoogaanka, awooda dhisme, iyo geedi socodka hay'adda go'aamada iyo fulinta.

**Talooyinka golaha deegaanka iyo shaqaalaha.** Habka ugu wanaagsan ee loo dejiyo qorshaha siyaasadeed waa in lagu tiirsdad/ cuksadaa talooyinka shaqaalaha golyaasha degaanku u gudbiyaan galaha.

Warbixintoodu waxaa **lagu xiraa** barnaamijka isbedel ee shaqaaluhu doonayo inuu sameeyo iyo qaybinta lacagta la qoondeeyay in la helo iyo waxyaabaha ka imaan kara siyaasad ahaan. Inkasta oo jidkan ama habkani inta badan uu golaha siiyo aragti aqoon yahan, waxuu habkani iska indha tirayaa amuur ballaaran oo bulshada khuseeya iyo xiriirka dibadeed ee goluhu la leeyahay hay'adaha kale ee bulshada ee golaha la qaybsada dhibaatooyinka iyo fursadaha sida sharciyo u kala xadeeyay.

**Iska dhaxgalka golaha deegaanka iyo shaqaalaha.** waxa soo badanaya in golayaasha deegaanka ay sanadkiiba ayaamo ku bixiyaan ka fakarida qorshaha mudda dheer iyo cabashooyin shaqaalaha muhiimka ah. aanay wax kale qaban oo ay la qaataan shaqaalahooda muhiimka. Shirarkani (ama meelaha gaarka ahi) waxay badanaaba ku qabsoomaan meelo ka baxsan magaalada waxaan badanaaba shirka isku dubarida nin iyaga ka baxsan oo fududeeya oo ah qof aqoon u leh maamulka doodaha koox yar. Waxay fursad u tahay golaha iyo shaqaalahooda aqoonyahannada ah inay:

1. Dib u eegid dhibtaayinka ay wajahayaan,
2. Ka fakarida fursadaha ay tahay inay bulshada wax u tarayaan
3. In ay sameeyaan qorshaha muddada dheer (dejinta Siyaasadda).

**Xubinta  
G/Degaanku  
markuu yaha  
Siyaasad-  
dejiye**

**Tababarka  
Hoggaanka La  
soo doorto**

## Qormo

Inta badan, shirarkan meelaha gaarka ah, waxaa kasoo baxa warqado qoraal ah oo ay ka mid yihiin qorshe hawleed ay tahay inay ka mid ahaato waraaqaha miisaaniyadda ama ay u adeegsan karaan golaha maamulka iyo shaqaalaha farsamayaqaanka ah ee dawladda hoose hawlgalyada mustaqbalka.

Siyaasadda dibadda iyo doodaha siyaasadda. Magaalooyinka waa weyn sida dalalka horumaray waxay leeyihiin siyaasad dibadeed oo ku salaysan arrimaha iyo danaha deegaanka kuwaas oo dhaafi kara soohdintooda isla markaana saameyn kara deriskooda ama iyagaba deriskooda saameyn karo.

Qaar ka tirsan madaxda deegaanka ayaa xiriir ku tilmaama barnaamijkooda siyaadadeed ee dibadda. Si kasta oo loo tilmaamo, waxay ka qaadan karaan kaalin muhiim ah samaynta siyasaad toosan.

Waxaa soo kordhaya aqoonsiga in dowladaha hoose aanay keli ahaan shaqeyn Karin iskana indho tiri Karin deriskooda iyo qaybaha kale ee dawladda ku dhex jira, sida wakaaladaha biyaha iyo hay'adaha u xilsaaran xilka gaarka ah. Iyada oo maalinba maalinta ka dambaysa la aqoonsanayo in aanay dhibaatooyinka magaalo ku koobnayn soohdimaha magaalooyinka waaweyn, ayaa waxa isa soo taraya in lala yeesho dood siyaasadeed deriskaaga. Doodahaasi waxay keenaan habayn rasmiya, sida golayaasha dawladda

kale (ururo aan dowliga ahayn oo ka samaysan madax la soo doortay oo go'aan sankara haddii ay doonaan inay ka wada shaqeeyaan dhibaatooyinka ama fursadaha ay wada daneeyaan). Doodahaasu waxay keeni karaan baadhitaan siyaasadaha ka jira xadadka ku dhegan oo laga yaabo inay si lama filaan ah ugu dhacdo qofka ama waxyaabaha dhinac walba laga wada danaynayo

Doodda bulshada iyo golaha.

Golayaal badan waxay bilaabeen dood bulshadu si

kala duwan. Doodaha ballaaran waxay yeeshaan qaabab badan oo koobsada wakhtiyo kale duwan. Waxay noqon karaan wax arrin keliya ku jihaysan ama ay ku jiraan waxyaabo badan oo bulshadu doonayso. Dhowr sano ka hor ayaa mid qorayaasha ka mid ahi waxa uu ku hawlanaa inu magaalo weyn kala taliyo siday uga samayn lahaayeen gobolka siyaasad dhaqaale. Fadhi qorshe siyaasadeed laba maalmood soconayey oo ay ku jireen 200 oo madax la doortay ah, saraakiil dawladda , wakiilo ganacsatada gaarka ah, odayaasha bulshada, culumada,

hoggaanka shaqaalaha iyo muwaadiniinta. Ka qaybgalayaashu waxay isla gaareen heshiis siyaasi ah oo ka kooban todoba qodob oo siinaya jihayn dadaallada horumarka

dhaqaale ee gobolka. Magaalooyinka waaweyn oo kalana waxay ku dhaqaaqeen inay bilaabeen qorsheynta siyaasadda oo ay ka qayb qaateen boqolaal muwaadiniin iyo madaxda bulshada.

Magaalo weyn oo galbeedka ah ayaa waxay lahayd koox balaaran oo si qoto dheer u baaray amuuraha iyo waxyaaba ay danaynayaan in ka badan labatan adeeg oo kala duwan oo ku xiran habab taageero oo magaalada ka dhex socda. Koox

**Xubinta  
G/Degaanku  
markuu yaha  
Siyaasad-  
dejiye**

**Tababarka  
Hoggaanka  
La  
soo doorto**

hoosaad kastaa waxay wakiil ku lahayd kooxdan ka balaaran ee kala talisa siyaasadda, taas oo waxyaabaha ay gaareen iyo waxyaabaha ay ku tashadaanba u gudbiya golaha iyo duqa magaalada. Taxanahan wada hadal ama la tashi waxay ka qaybgale walba wakhtigiisii ka qaadatay saacado fara badan oo dhowr bilood ah,

## Qormo

hase yeeshee waxay hogaankii magaalada siisay qorshe balaadhan iyo talooyin siyaasadeed taas magaalada jihatn siisay sanda fara badan.

Waxay bulshadu bilowday u bayrista dhinaca kaqaybgalka habka dimoqraadiyadda iyo isxukunka deegaan qaarkood inay si toos ah deriskooda ula shaqeeyaan iyaga oo ka caawinaya qorshe ay si weyn ugaga qaybgelayaan abuurista iyo fulinta barnaamijyada magaalada iyo adeegyada deegaanka gudihisa ah. Erayga la isticmaalayo ee tilmaamaya jidka dadweynaha ama dadka caadiga ah ee dejinta siyaasadda oo ah “xukun hoose”. (xukun hoosaadku waa taxane siinaya dowladaha hoose awood, xilka jawaabid, madax bannaani, idmanaan, iyo xorriyad ay u haystaan inay si toos ah amuuraha deegaanka wax uga qabtaan iyagoo aan kuwa ka sarreeyaana faragelin ku sameyn.) dowladaha hoose qaarkood waxay hadda qaateen fekraddan kuna fidiyeen bulshada iyo heerarka deriska ah ama awoodaha kale. In kasta oo taasi tahay ra’yi xag jira, haddana taa waxa loo arki karaa taxanihii habka dimoqraadiga ah oo si dabiici ah u kordhey. Mararka qaarkood golaha ayaa u xilsaaran shaqaalaha qaarkood inay si toos ah ugala shaqeeyaan qayb hoosaadyada dowladda hoose tacabkooda si ay u noqdaan qaar isku kalsoon oo jihaysan.

**Tuulada aan lagu doodini ma  
dhisanto.**

**Maahmaah African ah**

**Xubinta  
G/Degaanku  
marku yahay  
Siyaasad-**

**dejiye**

**Tababarka  
Hoggaanka  
la soo doorto**

**14**

### **Fududeeyaha Siyaasadda**

John Naisbith buuggiisii ugu fiicnaa xagga iibka oo la oran jirey, Megatrends, waxa uu ka hadlayaa isbeddelka dowlada madaxda deegaanka ee la doortay iyada oo waddamadu

hore ugu marayaan xukunka deegaankooda iyo dimoqraadiyadda laga wada qayb gelayo. Ninkani wuxuu rumeysan yahay in aan dowlada koowaad ahayn, mid Wakiil ka ah deegaanka lagaa soo doortay, go’aan qaadashadana ay saldhig u tahay xiriirka wakiilnimo. Waxaad noqotay mid sabab u ah dhismaha midnimo iyo Isla garasho. Wada shaqeynta cusub ee hadda ee lala shaqeynayo bulshada ayaa waxay dib u qeexday dowlada siyaasad dejinta xubinta Golaha Deegaanka. Sida uu qabo Carl. H. Neu, Jr.

dowlada wuxuu yahay:

1. Tilmaamid iyo u fiisasho amuuraha u baahn in wax laga qabto;
2. Fududeynta wadaagga xogta, xiriirinta bulshada iyo in cod bixiyayaasha la baro arrimaha muhiimka u ah noloshooda.

3. In aad isku keentid fekredaha iyo kooxaha kala duwan;
4. Abuurid isfaham guud oo bulsho dhinacyada aragtiyaha, ujoodeeyinka iyo hawlaha u baahan in la fuliyo;

## Qormo

5. Isla-fahmka soo ifaya waxa socodsiink ara waxqabadka gole sharciyeed;
6. Fulinta barnaamijyada, siyaasadaha iyo mashaariicda ay abuurtay waxqabadka golaha sharci dejinta ee ina tusinaya isfahamka bulshada; iyo
7. Joogtaynt aragtida iyo fulinta tallaabooyinka la qaaday.

Waxaa dowlka siyaasad-dejinta ku darsama dhowr shaqo. Waxaa kuwaan ka mid ah dhacdooyinka sida dhigidda ujeedooyinka, qorshaynta hirgelinta, dhexgalka kuwa kale ee ku saabsan xilka siyaasadda.

Waxaanu isku daynay inaan soo gudbino ahmiyadda ay leedahay siyaasad dejinta / dhisidda hadafyada, ka fekerka istaraatiijiyadda iyo gudashada dowlka xubinta golaha deegaanka. Waxaa caddaanaysa baahida ay bulshadu u qabto kalsooni mowqif iyo ka hor deg looga baahan yahay adiga iyo xubnaha kale ee Golaha Deegaanka kugula jira oo aad ku hoggaamisaan baahidda bulshada ee ugu mudan.

Kor joogayaasha golayaasha deegaanka oo dhami uma hayaan weyn siyaasad ahaan waxyaaba ay gaareen kuwa dhigaaga ah ee meelaha kale. Waxaan rabnaa inaan ku dhameeyo qoraallkan gaaban qoraal yar oo adag oo aan ka so dheegnay nin ka mid u fiirsadayaashan. James Svava, buuggiisii uu ku lafa gurayay ee la odhan jiray Hogaanka rasmiga ah ee magaalada, ayaa wuxuu tilmaamay Maraykanka siday u dejiyaan siyaasadda deegaanka.

## Xubinta Siyaasad- dejiye

waxaa jira siyaasad an Ujeedo lahayn. Siyaasadaha qaarkood waxay ka nolol dheeraadaan ujeedadii ay ka dhasheen ama waxay so baxaan iyaga oo ka madax banana samaynta ujeedooyinka. “Siyaasadu” waxay noqon kartaa, sida Lynn uu u arkay “fasiraad hore laga sameeyay hawlaha dowladda oo ay saldhig u tahaynatijada ka dhalatay aragtida kuwa danaynaya hawsha.” Halka ay ku tusi lahaayeen Ujeedo hore, siyaasaddaha dadka waxa waaye. “natiijo ahaan, gacan labad indha xiran. : ujeedo dhisido waxat dhici kartaa si ka gedisan sida la filayo iyadoo laga soo fiiriinaayo hawlaha jira. Marka hawlhooda siyaasad dejinta, ayaa golayaal badani ku guul daraysteen inay tusan jihada laga filayo ama ay iyagu naftooda ka filayaan.

## Tababarka

## Qormo

Siyaasad dajinta oo dhan ma noqoto mid miro dhal ah. Siyaad dejinta ma ahan mid aay amaanaan dadkii loo dajiyay in ay u adeegto. Dhammaan siyaad dejintu ma ahan mid sharfan, siyaasad dejinta oo dhan ma ahan mid horumar ujeeda. mararka qaarkood waxay na tustaa qorshe dib u dhac ah. Si kastaba ha ahaatee, siyaasad dajintu waxay udub dhaxaad u tahay hoggaan la doortay waxay istaahishaa falkerkaada iyo wax qabadkaada. Siyaasadu waa matoorka dowlad wanaagga.

**Cidna ha u dooran, wax  
aanad naftaada u doorateen.**

**Maahmaah Faarisi ah**

**Xubinta  
G/Degaanku  
marku yahay  
Siyaasad-  
dejiye**

**Tababarka  
Hoggaanka  
la soo doorto**

- Siyaasaddu waa eray macnayaal badan leh.
- Marka siyasad-dejintu tahay waxay xaq u leeyihiin madaxda la doortay, qaar kale ayaa soo gala iyaga oo si qalad ah u turjimaya waxaad soo sharciyaysid ama abuuraya siyaasado ay leeyihiin oo aan qornayn.
- Hoggaanka siyaasadda wuxu yahay in la gaarsiiyo si dadka kale lana soo geliyo nidaamak.
- Isxukunka degaanku si dhakhso leh ayuu isu bedelayaa isaga oo la jaanqaadaya koritaanka ka qayb galka dimoqraadiyadda. Tan macnaheedu waxa waaye in loo baahan yahay siyaasada cusub oo la socon karta xaqiiqada cusub.
- Siyaasadaha iyo ujeedooyinku waxay noqon karaan talaabooyin la isku bedeli karo marka aad ku jirtid hab qeexidda mustaqbalka bulshadaada.
- Istratiijiyadu waa fulinta ujeedooyinka iyo siyaasadaha.
- Golayashu waxay heystaan siyaabo badan oo u fududeynaaya in ay noqdaan siyaasad dejiya howl kar ah iyo in ay ka waagsanyihiin kuwa kale.
- Waxa soo kordheysa gacan saarka golayaasha ay la leeyihiin bulshada marka ay isku deyayaan inay dejiyaans iyaasadaha iyo ujeedooyinka mudda dheer.
- Siyaasadaha iyo ujeedooyinka waxa loo dejiyaa inay waxtaraan dadka kale waxa laga yaabaa in aanay ka helin balanqaad iyo amaanid kuwa loo qorsheeyey inay wax tarto hadaanay kolka hore dejintooda laga qaybgelin.
- Siyaasad-dejintu waa xudunta maamul wanaaga. Taabba-galka samaynta siyaasaddu waa xudunta xukuumad fiican.

**Xubinta  
G/Degaanku  
marku yahay  
Siyaasad-  
dejiye**

**Tababarka  
Hoggaanka  
la soo doorto**

1. Mararka qaarkood “xubin gole sharci dajiyey” waxa loo adeegsadaa in lagu qeexo dowlad siyaasad dajin. Inakasta oo ay dhabtahay in sharcidajiyaha yahay qof sameeyaya sharciyada ( ama siyaasadaha) dowlad sharci samayntu waa mid farsaada ahaan aad u kooban marka la qeexayo waxa xubintu qabato; ereyga “doode” ma bixiyo qeexid ku filan doorka dejinta siyaasadda. Inakasta oo u doodista lagu sheegi karo mowqifka siyaasiga ah. Laakiin inaad ahaatid u doodaha dadka soo doortay.
2. French Jim, “Iftimino ku saabsan xafiiska dawladda” Texas magaaladeed yar iyo teeda weyn, May 1992, p28.
3. Neu, Carl H., Jr. and Ethridge, Jack, “Community-sensible governance: the emerging political reality of the 21<sup>st</sup> century,” National Civic Review, Fall 1991, p. 381
4. For more information on this experience and others of a similar nature, see Public Technology, Inc., Strategies for Cities and Countries: A Strategic Planning Guide (Washington, Dc. Public Technology, Inc.), undated.
5. Naisbitt, John, Megatrend: Ten New Directions Transforming our lives (New York, Warner Books, 1982).
6. Neu, Carl H., Jr., “Strategic governance: a community integration process,” National Civic Review, Summer 1988, pp.139-140.
7. Savara, James H., Official Leadership in the city (New York, Oxford, 1990), P.

**Xubinta  
G/Degaanku  
markuu yahay  
Siyaasad-  
dejiye**

**Tababarka  
Hoggaanka  
la soo doorto**

**QAYBTA 2aad**

**Aqoon-is-weydaarsi**

**XUBINTA G/DEGAANKU MARKUU  
YAHAY SIYAASAD-DEJIYE**

**Xubinta  
G/Degaanku  
marku yahay  
Siyaasad-  
dejiye**

**Tababarka  
Hoggaanka  
la soo doorto**

**Ujeeddo:**

**Ujeeddo:**

Maamulka Dowladda hoose wuxuu u baahan yahay in madaxda la doortay ay go'aamiso ahdaafta, kadibna ahdaaftaas loo badalo barnaamijyo iyo adeegyo ay ku gaaraayaan xeer goyn siyaasadeed. Si kale haddii loo dhigo siyaasaddii waxay tilmaantaa xaaladda ugu xasaasisan ee u dhexeysa waxay dawladdu go'aansatay inay samayso (ahdaafta iyo muraadada) iyo sida ay ku talo jirto inay u qabato (istraatijooyinka iyo qorsahyaasha).

**Ujeeddooyin> Siyaasado> Istaraatejiyado**

Aqoon-is-weydarsigan waxa loo loo diyaariyay inay ka-qayb-galayaasha ay uga warbixiso nooca siyaasadda dawladda hoose: - sida u samaysanto, sida lo kala saro siyaasadaha iyo dhibatooyinka, hadafyada iyo istraatijooyinka. Ka-qayb-galayaasha dhamaysta aqoon-isweydaarsigan waxay fahmi doonaan lagama maarnimadda siyaasad dejintu kaasoo ah habraca u-khaas ah iyo natiijooyinka xukunka lagu gaaro siyaasad kama'ah.

**Tusmada**

Tilmaan kooban oo ku saabsan howlaha nooc kasta ee waxbarasho ah ayaa hoos ku xusan oo loo qoondeeyay waqti go'an. Haddii aad rabto in aad habkaa wax ka beddesho, wax ka saarto, ama aad ku dartaba agab tababar oo aad iska leedahay adigu, xor ayaad u tahay in aad sidaa yeesho.

**2.1 Layli: Diyaar-garow: Xusuusta Siyaasadeed**

Ka-qayb-galayaasha ayaa dib u milicsanaya waayo-aragnimadooda siyaasadihii la fuliyay ama ay ahayd in la fuliyo: (45-60 daqiiqo)

**2.2. Layli: Halxiraale Siyaasad-dejiye**

Ka-qayb-galayaasha ayaa liiska ka sheegi doona qoraalka ah: Siyaasado, Ujeeddooyin, Dhibaatooyin iyo Istaraatejiyado; iyaga oo marka hore keli keli u shaqeynaya, ka dibna kooxo yar yar. Natiijooyinka ayaa la is-garab dhigi doonaa: (60-75 daqiiqo)

**2.3. Bandhigga Tababaraha**

Sharaxaad kooban oo ku saabsan kaalinta xubnaha golaha deegaanka marka aya yihiin siyaasad-dejiyayaal. Ka soo qaado qoraalidii hore tusaalooyin si aad u qeexo geedi socodka siyaasad dajinta si loo soo kala saaro hadafyada, siyaasada iyo istiraatiijiyadaha.

**Xubinta  
G/Degaanku  
marku yahay  
Siyaasad-  
dejiye**

**Tababarka  
Hoggaanka la  
soo doorto**

## **Qormo**

Qeex dadka ku howlan geedi socodka siyaasad dejinta iyo xeeladaha kala duwan ee loo agaasimo wadahalada siyaasadeed (30 daqiiqadood)

### **2.4. Daraasad Xaaladeed: Maaraynta Qashinka Carraweelo**

Ka-qayb-galayaasha waxay ka sheekeeyeen xaalad daraasad oo qeexaysa guusha laga gaaray dejinta qorshaha maareynta-qashin oo ay sameeyeen golaha deegeenka. Iyaga oo kooxo yar yar u shaqeynaya ay tilmaameen dhibaatooyinka, hadafyada, siyaasadaha, iyo istraatiyooyinka ay daraasadda xaaladeed gudbin karto ( 60-75 daqiiqo)

### **2.5 Layli: Tijaabin-xirfadeed**

Iyagoo kooxo yar yar u shaqeynaya, ayey k-qayb-galayaashu ka doodi doonaan dhibaato magaalooyinkooda haysata, mid bay ka dooran doonaan, waxayna qori doonaan qoraalka hadafyada, qoraalka Siyaasadda, iyo Istraatiyo, mid ama ka badan oo loo adeegsan karo si loo gaaro hadafka. (90-120 daqiiqo)

### **2.6 Layli: Gudbin xirfadeed**

Ka-qayb-galayaasha waxay dib u eegi/ milicsan doonaan waxay barten, ka dibna waxay ballan adag ku qaadi doona in ay adeegsan doonaan waxay aqoon-is-weydaarsigan ka barten. (30-45 daqiiqo)

**Xubinta  
G/Degaanku  
marku yahay  
Siyaasad-  
dejiye**

**Tababarka  
Hoggaanka  
la soo doorto**

## 2.1:Layli diyaarg-arow: Xusuusta siyaasadeed

**Waqtiga loo baahanyahay: 45-60 daqiiqo**

### **Ujeeddo:**

Layligani wuxuu ku dardar-gelinaa Xubnaha golaha deegaanka in ay dib u xusuustaan waayo-aragnimadooda la xiriirta siyaasad-dejinta dadweynaha.

### **Hab-raac**

Ka-qayb-gale kasta sii nuqul ka mid ah qoraalka hoose, ama ugu daabac wargaysyada. Qoraal siyaasadeed waa aragti qoraal oo ku saabsan mawqif gaar ah ee Gole, oo saldhig u ah qorshe hawleed arrin lagu xalinaayo, hadafna lagu gaaraayo. Tusaale ahaan dowladda hoose qaybteeda laysinada iyo cashuuraha waa inay soo ururisaa cashuuraha baaqday.

Ka dib markay ka-qayb-galayaashu akhirstaan, weydii in qof kastaba In uu qoro qoraal ( statement) uu ku tilmaamayo siyaasadaha uu golihiisu gaaray labadii sannadood ee na dhaaftay. Waxa kale oo aad kala dooransiin kartaa in qofkii doonaa u qori karo qoraal ( statement) siyaasadeed oo uu golihiisu inuu gaaro ay ahayd, hase yeeshee aan dhicin. Ka-qayb galayaasha u soo jeedi in ay isticmaalaan qeybta hoose si ay ugu qoraan qoraalkooda ( statement)

### **Siyaasadda Golahaaga**

<hr/> <hr/> <hr/> <hr/> <hr/> <hr/> <hr/> <hr/>
---

**Xubinta  
G/Degaanku  
marku yahay  
Siyaasad-  
dejiye**

**Tababarka  
Hoggaanka la  
soo doorto**

## Aqoon- is-weydaarsi

Markay ka-qayb-galayaashu qoraan **qoraalka** siyaasadeed, u qaybi dhowr kooxood oo yar yar. Weydii in koox kasta ka jawaabto su'aalaha **qoraal** kasta ee siyaasadeed:

1. **qoraallada** siyaasadeed ee la go'aamiyay:
  - Maxay ahayd siyaasadda la rabay in la gaaro (hadaf)?
  - Maxaa run ahaan la **gaaray**?
2. **Qoraal** siyaasadeed kasta oo ay ahayd in la qabto:
  - ‰ Maxay ahayd in la gaaro marka siyaasaddaan la dhaqan galiyo?
  - Maxaa laga dhaxlay qaadasho-la'aanta siyaasadda?

20 daqiiqo ka dib, iskugu yeer kooxihii, koox kasta weydii warbixinno kooban oo qoraalkaadii ku saabsan.

Xubinta  
G/Degaanku  
marku yahay  
Siyaasad-  
dejiye

Tababarka  
Hoggaanka  
la soo doorto

**Halxiraalaha Siyaasad**

**Waqtiga loo baahanyahay: 60 – 75 daqiiqadood**

**Ujeeddo:**

Layligani waxa uu ka caawinayaa ka qaybgalyaasha kala saaridda dhibatooyinka, ahdaafta, siyaasadaha, iyo istiraatiijiyada.

**Hab-raaca:**

U qeybi nuqulladda laba bog ee halxiraalaha oo ka bilaabmaya bogga soo socday ee ka dambeeya foomka qiimeynta ( scoring key). Qof walba oo ka qayb galayaasha ka mid ah weydii in dhamaystiro halxiraalaha asoo raacaya tilmaamaha la siiyay.

Markay ka qayb-galayaashu dhameeyaan halxiraalaha, u qaybi afar kooxood oo yar yar oo ka kooban shan illaa toddobo, ka dibna waxaad siisaa nuqulkii labaad ee halxiraalaha koox kasta. U sharrax ujeeddada layliga oo ah in ka qayb-galayaasha koox kasta ka doodaan jawaabahooda ka dibna go'aamiyaan in koox keliya ka jawaabaan qoraal kasta.

Waxaad kooxaha siisa illaa shan iyo toban daqiiqo si ay u dhameeyaan shaqada. Ka dibna, sii koox yar oo walba nuqul foomka qiimaynta (fiiri Hagaha tababaraha ee ku saabsan tababarka madaxda la doortay). Adoo adeegsanaya foomka qiimaynta, hel dhibcaha ka qayb-galayaashu ay qoreen, tirada jawaabaha ay qof qof ahaan ama koox ahaan ay garteen. Waxaad kaloo koox kasta weydiisaa inay calcelis ahaan soo saaraan inta qof waliba gooni ahaan sax keenay si loo barbardhigo waxa kooxdu keentay.

Dib isugu yeer dhammaantood waxaad na weydiisaa koox kasta warbixinadooda. Sida badan, kooxaha yar yari waxay keeni doonaan jawaabo saxan oo ka badan tan isku celcelis ahaan tan qofka kaliya saxo. Ka dooda natiijadan ka dibna weydii ka qaybgalayaasha waxa ay u dhacday in koox koox u shaqayn ka waangsantahay qof qof u shaqayn. Waxaad weydiisaa dhibaatooyinka ay dhamaan ku u yeelan karaan siyaasad-dejinta Golayaashooda.

**Xubinta  
G/Degaanku  
marku yahay  
Siyaasad-  
dejiye**

**Tababarka  
Hoggaanka la  
soo doorto**

Layli: **Halxiraalaha Siyaasad-dejiyaha**

Aqri mid kasta oo ka mid ah 16-ka qoraal ee hoose. Mid walba oo qoraalka ka mid go'aami in ay tahay: dhibaato, hadaf, siyaasad ama istraateji. Dooro qoraalka ka dibna isku-tallaab ku qor sanduuqa ku habboon ee ku hor yaal.

Qoraal	dhibaato	hadaf	siyaasad	Istaraa-
2. 1. kaliya waddooyinka ku yaal Bartmaha maagaalooyinka ayaa laami ah,	<input type="checkbox"/>	<input type="checkbox"/>	<input type="checkbox"/>	<input type="checkbox"/>
3. 5% miisaaniyadda <b>adeegga</b> shaqaalaha u wareeji tababarrada,	<input type="checkbox"/>	<input type="checkbox"/>	<input type="checkbox"/>	<input type="checkbox"/>
4. Laba maalmood u qorshee Golaha/shaqaalaha kulan Hadaf-dejin ah,	<input type="checkbox"/>	<input type="checkbox"/>	<input type="checkbox"/>	<input type="checkbox"/>
5. Qabshada <b>howlaha shaqo ee jira sannad walba waa in aysan ka yaraan 95%</b>	<input type="checkbox"/>	<input type="checkbox"/>	<input type="checkbox"/>	<input type="checkbox"/>
6. Jidadka la samayn doono mustaqbalka waa in ay ahaadaan laami,	<input type="checkbox"/>	<input type="checkbox"/>	<input type="checkbox"/>	<input type="checkbox"/>
7. Goobaha qashin gurka magaalada ayaa bishii la soo dhaafay buuxsantahay	<input type="checkbox"/>	<input type="checkbox"/>	<input type="checkbox"/>	<input type="checkbox"/>
8. 10 ka sano ee soo socdo qof waliba waa in in helaa guri uu dagi karo.	<input type="checkbox"/>	<input type="checkbox"/>	<input type="checkbox"/>	<input type="checkbox"/>

Xubinta  
G/Degaanku  
marku yahay  
Siyaasad-  
dejiye

Tababarka  
Hoggaanka la  
soo doorto

**Aqoon-is-  
weydaarsi**

8. Ku dadaal qaab waliba oo aad adeegyada uga dhigi karto mid qaas si loo yareeyo qarashaadka

9. In la helo ilaa 5000 qoys biyo nadiif oo ay cabi karaan sanadkan gudahiisa

10. Dadka degan agaagarada biyo mareenada iyo fatahaadaha waa in ay helaan badbaado ku filan dhamaadka sanadka

Lacago lagu bixiyo meelaha cusub ee lagu madadaasho lama hayo..

12. **Isku keen guddi muwaadiin ka kooban si ay u dersaan suurta-galnimada dib-u-dhiska bartamaha magaalada**

13. Samee xariir adag oo u dhaxeeya magaalooyinka deriska ah, si ay u kaydiyaan lacag, uguna fogaadaan adeegyada a isku mid ah fulintooda

14. ka faa'iidayso dhamaan deeqaha heer qaran iyo taageerooyinka farsamo ee ka jira magaaladda

**Xubinta  
G/Degaanku  
marku yahay  
Siyaasad-  
dejiye**

**Tababarka  
Hoggaanka la  
soo doorto**

15. u oggolow shirkad la-  
talineed inay diraasad ku  
samayso tariifada ( lacgta  
biyaha) biyaha

<input type="text"/>	<input type="text"/>	<input type="text"/>	<input type="text"/>
----------------------	----------------------	----------------------	----------------------

16. Dolwaddu waa in ay dhintaa  
kalabar barnaamijyada  
caawimadda ee u qoondeysnaa  
daryeelka cafimaadka.

<input type="text"/>	<input type="text"/>	<input type="text"/>	<input type="text"/>
----------------------	----------------------	----------------------	----------------------

### Warqadda dhibco-bixinta

#### Kooxaha

	1	2	3	4
%o Dhibcahaaga gaarka ah (Tirada saxa ah)	_____	_____	_____	_____
%o Celceliska dhibcaha gaarka ah (Wadarta dhibcaha gaarka ah u qaybi ka-qayb galayaasha)	_____	_____	_____	_____
%o Dhibcaha Kooxda yar	_____	_____	_____	_____
%o Dhibcaha ugu sarreeya ee ka-qayb-galayaasha	_____	_____	_____	_____
%o Dhibcaha ugu hooseysa ee ka-qayb-galayaasha	_____	_____	_____	_____

**Xubinta  
G/Degaanku  
marku yahay  
Siyaasad-  
dejiye**

**Tababarka  
Hoggaanka la  
soo doorto**

## **2.3: Bandhigga Tababaraha**

**Waqtiga: 30 daqiiqo**

### **Ujeeddo**

Bandhigga waxaa loogu talagalay inuu ka-qaybgalayaasha siiso fikradaha iyo aragtiyaha ku saabsan doorka siyaasad-dejiyuhu uu ka qaadanayo iyo saldhig-afkaareed ee ay u isticmaali karaan si shakhsi ah iyo kooxda layliyadan ku jira aqoon-isweydaarsigan.

### **Hab-raac**

Diyaari banidhig ku salaysan macluamadka lagu soo arkay qormodii hore ee doorka siyaasad-dejiyaha. Si gaar ahna, sharax habraaca siyaasad-dejiyaha sidoo kalena kala sooc ahdaafta, siyaasadaha iyo istaraatiijiyadaha. Sharax cidda ku ku lugleh habraaca siyaasad-dejinta iyo siyaabaha kala duwan ee loo fuliyo dood siyaasadeed.

Macluumaad tusmaysan kuna qoran kaadhahd baa laga yaabaa inay kaa caawiyaan sidaad macluumaadka si nidaamsan aad u kor marin lahayd adiga oo aan dib uga dhicin qorshahaaga. marka aad ku guda jirto bandhiga tababarka, waydii su'aalo wakhtiyo kala duwan si aad u u cabirto fahanka ka qaybgalayaasha iyo si aad kasbato foajignantooda. Ku xooji bandhiga cashirka, muqaalo ku caawiya sida jaraa'ido hore loo sii daabacay iyo adeegsiga projectors si ay uga siiyaan casharka fahan dheeri ah.

**Xubinta  
G/Degaanku  
marku yahay  
Siyaasad-  
dejiye**

**Tababarka  
Hoggaanka la  
soo doorto**



## **2.4:Diraasad-xaaladeed:QorshahaQashin-gurka ee qashinka ee Arraweelo**

**Waqtiga: 60 – 75 daqiiqo**

### **Ujeeddo**

Hab-raaca siyaasad-dejinta waa howl adag. Siyaasaduhu waa muujin dan ama Ujeeddo ay dawladda hoose ku fulinayso ujeedo ama hadaf iyadoo u maraysa talaabooyin u gaar ah ama istaraatiijiyado si looga gudbo dhibaatooyinka ama lagu hantiyayo fursad soo waajaheysa beesha.

Arrinta la darsayo waa sida loo caawinayo ka qayb galayaashu inay fahahmaan adayga habraaca siyaasad-dejinta iyo sida xildhibaanadu ay ku noqon karaan siyaasad-dejiyayaal firfircoon.

### **Hab-raac**

Sii mid kasta oo ka mid ka qaybgalayaasha nuqul lagu magacaabo arrinka qorshaha maareynta qashinka ee Arraweelo. Weydii inay ka qaybgalayaashu akhriyaan qodobkan. Marka ay ka qaybgalayaashu akhriyaan qodobka, u qaybi afar ilaa shan kooxood oo yar yar. Koox kastana waydii inay ka jawaabto afar su'aalood oo la laxiriira xaalada mowduca kadibna gadaal uga warbixi jawaabahooda muddo ilaa 20 daqiiqo ah.

Marka ay kooxaha yar- yari ka warbixiyaan koox kasta weydii sida ay uga jawaabeen su'aal kasta. Dhiirigeli dood furan iyo is barbardhiga qodobadda aragtiyaha.

**Xubinta  
G/Degaanku  
marku yahay  
Siyaasad-  
dejiye**

**Tababarka  
Hoggaanka  
la  
soo doorto**

## Qorshaha Maareynta Qashinka Arraweelo

### Xaaladda

Magaalada Arraweelo waxay qashinka la soo ururiyo ee adkaha ku shubtaa godadka dhulka laga qoday oo aan dabool lahayn. Godadkaasi waxay buuxsameen kal hore, inkastoo qashinka sidii uun loogu qubo. Taasi waxay sababtay xaalad fayodhawr xumo, sida qadhuun xoogan, iyo iyadoo noqotay goob dirxi ka dhasho iyo cayayaanka kale ku tarmaan.

Qorshahaas golaha-deegaanka ee lagu aasayo godka qashin-qubka ee kor ka furan ayaa waxa ka war helay koox ganacsato rayid ah oo leh warshado sameeya shooladaha iyo maacuunta wax lagu kariyo. Wershadleydani waxay birta duugawday ka urursan jireen goobaha qashin qubka furan taasoo uu ku tiirsanaa wax soosaarkoodu. Goobaha qashinka laga soo ururiyo sida guryaha iyo goobaha ganacsiga ee lagu shubo godadka daboolan markiiba ciida ayaa lagu roгаа, taasoo keenaysa inaan laga urursan karin birta duugawday si siyaabo kale looga faa'iidaysto. Qaar ka mid ah xubnaha ugu cad cad ee kooxdan warshadleyda ah ayaa bilaabay inay culays ku saaraan xubnaha golaha-deegaanka si ay u tixtaliyaan islamarkaana la yimaadaan hab kale oo wax lagaga qaban karo dhibaatooyinka qashin qubka islamarkaana aan duudsiyeynin helitaanka birta duug ah.

Iyadoo golaha magaaladu aad u walaacsanyihiin inay dhibaataada qashin aasidda xal u helaan islamarkana ka fogaanaya inay inay ka hor yimaadaan rabitaanka qaybaha bulshada rayidka, ayey bilaabeen inay xalal kala duwan raadiyaan. mid ka mid ah xildhibaanada golaha ayaa sheegay inay jiri karaan waxyaale kale oo bulshadu isticmaasho in lagu waayo hawlgalkan qashin aasida. Taasi waxay bilowday dood xiiso leh.

Xildhibaan kale, oo ka soo hor jeeda dib-u-warshadaynta ayaa tilmaamay inay culays dheeraad ah ku keenayso dub-u-warshadayntu guriga iyo ganacsiyada, iyadoo waqti dheer ku qaadanayso kala soocida alaabta ay tuurayaan ama qubayaan.

Si uu goluhu u helo siyaabo kala duwan oo ay arrinta uga midho dhaliyaan uguna helaan bulshada afkaar biirsi. Wuxuu golaha-deegaannku dhisay guddi maareynta qashinka. Hawsha guddida loo xil saarey waxay ahayd labo arrimood:-

- (a) Inay xog ka keenaan suuqa ay yeelan karaan nuucyada kala duwan ee alaabada qashinka ahi sida; xashiishka qoyan, weelka dhalyoonka ah iyo caagaga.
- (b) Inay soo jeediyaan habab lagaga sooci karo ka hor intaan goobta qashin qubka la geyn kuwaas oo noqon kara:

- A. Goobta Goobta qashin-qubka.
- B. qashin ka soo baxo,- ama
- C. Goob labadaas u dhaxaysa.

Guddiga waxaa loo cayimey inay warbixin ku keenaan muddo lix bilood gudahood ah.

**Xubinta  
G/Degaanku  
marku yahay  
Siyaasad-  
dejiye**

**Tababarka  
Hoggaanka la  
soo doorto**

**Sua'aaalo**

1. Xaaladdan markaynu qaadanno, waa maxay dhibaatooyinka ama fursadaha ka hor imanaya G/Degaanka?
2. Maxay yihiin ahdaafta ay hiigsanayaan G/Degaanku si ay hore ugu mariyaan maareynta qashin-gurka?
3. Waa maxay siyaasadaha G/Degaanku u cuskanayo ama u raacayo fulinta arrintan?
4. Maxaa istaraatejiyado ay fuliyeen G/Degaanku si ay hore ugu mariyaan siyaasadooda qashin-gurka?

**Xubinta  
G/Degaanku  
marku yahay  
Siyaasad-  
dejiye**

**Tababarka  
Hoggaanka  
la soo doorto**

**Aqoon-is-  
weydaarsi**

**Qodobbada  
Tababaraha**

**Xubinta  
G/Degaanku  
marku yahay  
Siyaasad-  
dejiye**

**Tababarka  
Hoggaanka la  
soo doorto**

**32**

**Waqtiga: 90-120 daqiiqo**

### **Ujeeddo**

Marka ay ka-qayb-galayaashu qaataan fikrado cusub oo ay u adeegsadaan inay wax ka qabtaan xaaladaha la soo darsa, ayaa keentay barasho tayo leh qiimaheeduna sareeyo. Layligani waa inuu dhiirigeliyaa siyaasad dejin ku salaysan xog uu goluhu ka helay ilo xogogaal ah, iyadoo ka qayb galayaashu lagu dardar gelinayo inay diyaariyaan hadafyada odhaahaha siyaasadeed, iyo istraatijoyinka lagu xalilayo arrimaha waqtigan ka taagan dawladda maxaliga ah.

### **Hab-raac**

Ka-qayb-galayaasha u qaybi kooxo ka kooban shan xubnood. Ka codso ka-qayb-galayaasha in midba kan kale la wadaago dhibaatooyinka soo waajahay golahooda waqtigan la joogo, gaar ahaan kuwa yeelan kara natiijoyin bulsho ama dhaqaalaha oo xun, haddii aan waxlaga qaban. Dhibaatooyinka dhici kara waxa tusaale aynnu u soo qaadan karnaa denbiyada oo kor u kacay, ama ilihii dakhliga dawladda maxaliga ah oo hoos u dhacay.

Ka-qayb-galayaasha qaarkood waxa laga yaabaa inay door bidaan inay kuwa kale la wadaagaan fursado si weyn faa'iido u yeelan kara deegaamadda uu golohoodu u adeego, haddii uu goluhu si dhakhso oo go'aan leh uu uga dhaqaaqo. Waxaa suuragal ah in fursadaha nuucan ahi ay keeni karaan in la abuurkaro warshado balaadhan ama warshado ganacsi oo kale loo abuur bulshada.

Ka dib markay ka-qayb-galayaashu wadaagaan dhibaatooyinka iyo fursadaha uu mid waliba waayo arag u leeyahay, ka codso in koox kastaaba kuwaas mid ka doorto oo ay qorto:

- a) Qoraal hadaf
- b) Qoraal siyaasadeed
- c) mid ama dhawr istraatijoyin oo hadafka lagu gaadhi karo.

U soo jeedi in koox kastaa ay magacaabato hogaamiye iyo qof natiijoyinka dooda qora si hadhow warbixin ay u noqoto.

Warqad laga qorayo natiijoyinka ayaa ku tusan bogga soo socda.

Kooxuhu ha isugu yimaadaan kulan guud, kadib ka codso koox kasta qof ka midi ihi inuu soo bandhigo waxyaalaha ay u soo jeedinayaan goluhu inuu wax ka qabto dhibaatooyinka kana faaidayso fursadaha ay kooxuhu ka doodeen.

**Aqoon-is-  
weydaarsi**

**Qodobbada  
Tababaraha**

**Xubinta  
G/Degaanku  
marku yahay  
Siyaasad-  
dejiye**

**Tababarka  
Hoggaanka la  
soo doorto**

**33**

## Siyaasadaha iyo istraatijoyinka

Hadafka aynnu doonayno inaynu gaadhno waa :- \_\_\_\_\_

\_\_\_\_\_

\_\_\_\_\_

Siyaasadda aynnu doonayno inaan qaadano waa:- \_\_\_\_\_

\_\_\_\_\_

\_\_\_\_\_

Qaar ka mid ah istraatijoyinka aynnu siyaasadda ku fulinaynaa si aanu ku  
gaadho hadfka waa:-

1. \_\_\_\_\_

\_\_\_\_\_

\_\_\_\_\_

2. \_\_\_\_\_

\_\_\_\_\_

\_\_\_\_\_

3. \_\_\_\_\_

\_\_\_\_\_

**Ku wareeji waraaqaha waaweyn si ay kuugu  
fududaato warbixintu**

**Waqtiga: 30-45 daqiiqo**

**Ujeedo**

Layligani waa inuu ka-qayb-galayaasha ka taageeraa siday waxyaalaha ay aqoon-isweydaarsiga ka barten ugu adeegsan lahaayeen howlaha ay wajahayaan siiba doorkooda xildhibaanimo.

Layligani wuxuu diirada saarayaa kor-u-qaadida rajooyinka; ku hawlgelida qorshayn suurto gal ah, iyo gelidda balano qof ahaaneed.

Shaqada inteeda badan waxa lagu qabanayaa qof ahaan iyadoo marmarka qaarkood leedahay isla xidhiidh wadaag ah.

**Garashada iyo Qabashada wax weyn ayaa  
u dhexeeya**

Guud ahaan waxa laysla waafaqsan yahay in muraadka laga leeyahay tababar uu yahay in kor loo qaado siyaabaha ay dadku wax u qabtaan iyadoo la tusaayo si ka wanaagsan siday hadda wax u qabtaan.

Run ahaantiina guusha tababar waxalagu qiyaasaa inta ay tahay karitaanka aqooneed eela-tababaraha iyo isbedelka dhaca inta tababarku socdo iyo markuu dhamaaddo dabadeedba.

Sida uu tababare u filaayo inuu tababar u sameeyo ka-qayb-galayaasha in yar bay dhacdaa, taasoo ku xidhan mudada uu aqoon-isweydaarsigu socday.

Haddii dhinaca kale laga eego, u-heelanaanta iyo soo-dhawaynta isbeddel ee ay go'aansadaan ka-qayb-galayaashu aqoon-iswaydaarsiga marka la xidhayo ayaa ka caawin karaan ka-qayb-galayaashu inay ku guulaystaan cadaadiska kaga iman kara naftooda iyo goobta shaqada. Tababaruhu wuu ka caawin karaa inay guul kaga gudbaan aduunyada waxbarashada oo ay u adeegsanayaan layli fudud oo qorshaysan. Waqtiga lagu qaato dhiirigelinta gudbinta aqoon, ayaa noqon kara inta u dhaxaysa fur gaaban oo araaraa xiiso leh iyo isbedelka waayo-aragnimo nololeed.

## **Aqoon- is-weydaarsi**

Sii ugu yaraan Soddon daqiiqo ama nusa saac dhammaadka aqoon-iswaydaarsiga si aad ugu jeedisid dareenka ka-qayb-galayaasha waxbarashooyinka muhiimka ah iyo dhiirri-gelintooda sida ay u sii wadi lahaayeen tijaabada waxbarashooyinkaas hawlaha xubnimadooda. Ku bilow siinta ka qaybgalayaasha ilaa 15 daqiiqadood inay si madax banaan uga shaqeeyaan gudbinta su'aalaha waxbarashada fudud.

Marka ka qayb galayaashu dhameeyaan su'aalaha, weydii inay si dhakhso ah ula qaybsadaan koox labo ama saddex arrimood ah oo ay ku tala jireen inay si ka duwan u sameeyaan doorkooda Xubin Gole Deegaan ee siyaasad-dejiye ahaan si ay u gebogebeeyaan aqoon-iswaydaarsiga.

**Xubinta  
G/Degaanku  
marku yahay  
Siyaasad-  
dejiye**

**Tababarka  
Hoggaanka  
la soo doorto**

## Wareysi Aqooneed

Daqiiqado dhawr ah ku qaado inaad milicsato dowlka siyaasad-dajiye, aaraada cusub ee kala kulantay aqoon-iswaydaarsigan, iyo dareenka aad ka qabto. Dabadeed, meesha bannaan ee hoose ku qor weer ama labo weerood oo tilmaamaysa wax xiiso leh oo aad naftaada ka baratay intuu aqoon-iswaydaarsigu socday.

Adigoo ku salaynaaya/ ka duulaaya/ ka shidaal qaadanaaya waxaad naftaada ka baratay iyo fursadaha isbedel ee uu aqoon-iswaydaarsigu kuu soo bandhigay, waa maxay labada ama saddexda shay ee aad damacsan tahay inaad si ka duwan sidii hore u qabato adigoo ah siyaasad-dajiye?

1. \_\_\_\_\_
2. \_\_\_\_\_
3. \_\_\_\_\_

Ugu danbayntii, waa kuwee carqaladaha naftaada ama goobta shaqo aad filayso in ay kula kulmaan markaad isku daydo inaad isbeddelo hirgeliso? Maxaad qaban doontaa si aad meesha ugu saarto ama aad u yarayso carqaladahaas?

**Carqalad**

**Waxaad meesha kaga sarayso ama ku yaraynayso**

- |          |          |
|----------|----------|
| 1. _____ | 1. _____ |
| 2. _____ | 2. _____ |
| 3. _____ | 3. _____ |

**Haddii aad baran karto, waad qaban kartaa**

**Xubinta  
G/Degaanku  
marku yahay  
Siyaasad-  
dejiye**

**Tababarka  
Hoggaanka la  
soo doorto**

## ERAYADA MUDNAANTA KOOWAAD/ EREY BIXIN

### ENGLISH

### SOOMAALI

- |                      |  |
|----------------------|--|
| 1. Accountability    | - <b>Xisaabtan</b><br>-Xilkaa Saaran yahay                           |
| 2. Action plan       | - <b>Qorshe hawleed.</b><br>-Qorshe Wax-qabad                        |
| 3.Active Listening   | - <b>dhegaysi feejigan</b><br>-Dhegaysi Darban<br>-Dhegaysi Mug leh. |
| 4.Alternative        | - <b>Kala Doorasho</b><br>-Wax bedeli kara wax kale                  |
| 5.Application        | - <b>Arji</b><br>Codsii<br>Adeegsi                                   |
| 6.Assessment         | - <b>Qiimayn</b><br>-Qiyaasid  |
| 7.Authority          | - <b>Awood Maamul</b><br>-Mas'uuliyiin                               |
| 8.Awareness          | - <b>Wacyi-galin</b><br>-Ka war qab                                  |
| 9.Basic Education    | - <b>Wax-barasho Asaasi ah.</b>                                      |
| 10.Beneficiary       | - <b>Dan ku Qabe</b><br>-Ka faa'iidayste                             |
| 11.Capacity Building | - <b>Awood dhisid</b><br>-Kobcin awoodeed                            |
| 12.Case Study        | - <b>Daraasad Xaaladeed</b><br>- Kiis Barasho                        |
| 13.Check list        | - <b>Liis Hubineed</b>   |
| 14.Civic             | - <b>Madani</b><br>-La xiriirta magaalo<br>-muwaadin                 |
| 15.Collaboration.    | - <b>Wada shaqayn</b><br>-Gacan siin                                 |

**Xubinta  
G/Degaanku  
marku yahay  
Siyaasad-  
dejiye**

**Tababarka  
Hoggaanka la  
soo doorto**

**Xubinta  
G/Degaanku  
marku yahay  
Siyaasad-  
dejiye**

**Tababarka  
Hoggaanka  
la soo doorto**

**38**

16. Committee	-Is Caawimid <b>-Guddi</b>
17. Communicator	<b>-Xariiriye</b> -Isgaarsiiye
18. Community	<b>-Bulsho</b> -Jaaliyad
19. Community Development	<b>-Horumarin Bulsho</b> -Horumarin Jaaliyadeed
20. Concepts	<b>-Fikrado</b> -Aragtiyo
21. Conceptual Hat Rack	<b>-Fikradda Metalaada Xilalka</b> <b>- Koofiyadaha Matalaya Dowrarka</b>
22. Conflict	<b>-Khilaaf</b> - Is-afgaranwaa
23. Consensus	<b>-Rayi la isku raacay</b> -Wadar ogol Aqbalaad fikrad guud
24. Consequently	<b>-Natiijo</b> -Cawaaqib
25. Constituency	<b>-Dagaan Doorasho</b>
26. Cooperation	<b>-Iskaashi</b> -Wada shaqayn
27. Council	<b>-Gole</b>
28. Councilor	<b>-Xubin Gole Deegaan</b> -Xubin ka tirsan Golaha deegaanka
29. Counter productive	<b>-Tacab Khasaarin/ Maax Dumin</b> -Lid ku ah.
30. Criteria	<b>-Cabirka wax lagu saleeyo</b> -Shuruudo wax lagu saleeyo.
31. Critique	<b>-Dhaleeceyn</b>
32. Decision Maker	<b>-Go'aamiye</b>
33. Definition	<b>-Qeexid.</b>
34. Delegation/Delegate	<b>-Wakiilasho</b> -Ergo
35. Democracy	<b>-Dimuqoraadiyad</b>
36. Description	<b>-Qeexid</b> -Sifo

37. Dialogue	-Sharax <b>-Wada Hadal</b>
38. Effective	<b>-Wax ku ool</b> -Sidii la rabay wax u tarid.
39. Effective leadership	<b>-Hogaaminta wax ku oolka ah.</b>
40. Efficiency	<b>-Wax qabad fiican leh</b>
41. Elected Leadership	<b>-Hogaaminta la doortay</b>
42. Empower/Empowerment	<b>-Awood siin</b> -Awood u fasaxid
43. Enabler/Enable	<b>- Karti galin/ Kartigeliye</b> - Awood siin
44. Essay	<b>-Qormo</b> -Maqaal
45. Ethical	<b>-Hab-dhaqan/ Anshax</b>
46. Evaluation/Evaluate	<b>-Qiimayn</b>
47. Evaluation Survey	<b>-Qiimayn Sahan</b> -Baaritaan qiimayneed
48. Exercise	<b>-Layli</b>
49. Facilitator	<b>Fududeeye/Sahle</b>
50. Feed back	<b>War Celin</b> Jawaab Celin
51. Financier	<b>-Masuul Maaliyadeed.</b>
52. Gender	<b>-Lamaane</b>
53. Goal	<b>-Hadaf</b> -Yool
54. Good Governanace	<b>-Maamul Wanaagsan</b> -Dowlad wanaag
55. Government	<b>-Xukuumad/ Dowlad</b>
56. Group Discusion	<b>-Dood kooxeed</b>
57. Guide	<b>-Tilmaamid</b> -Hage
58. Hand Book	<b>-Tilmaan Bixiye</b> -Tilmaame Bare.
59. Human Resources	<b>-Khayraadka Dadka</b>
60. Human Settlement	<b>-Deegaamaynta Aadanaha</b> Deegaamayn
61. Implementation	<b>-Hirgalin</b> -Fulin
62. Information	<b>-Xog</b>

63. Institution	-Wargelin <b>-Hay'ad</b>
64. Institution Builder	<b>-Hay'ad Dhise</b>
65. Institutionalize	<b>-Hay'adeeye</b>
66. Instruction	<b>-Amar</b> -Wax barasho -Wax barid
67. Key Point	<b>-Qoddobbo Muhiim ah.</b> -Qoddobbo Ma Dhaafaan ah
68. Leadership Process	<b>-Geedi socod Hoggaamineed</b>
69. Learning	<b>-Barasho</b> -Wax Barasho -Tacliin Barasho
70. Learning Objective	<b>-Ujeeddooyinka Barashada</b> -Yoolka Barashada
71. Local Government/Authority	<b>-Dowladda Hoose</b>
72. Majority	<b>-Aqlabiyad</b> -Inta Badan
73. Management Process	<b>-Geedi Socodka Maaraynta</b>
74. Meeting	<b>-Kulan</b> -Shir
75. Minority	<b>-Inta Yar</b> -Laga tiro badan yahay
76. Minutes	<b>-Hadal Qor</b> -Hadal qoraal
77. Mission	<b>-Ergo</b> -wafdi
78. Monitoring	<b>-La socod</b> -La saan qaad
79. Negotiation/Negotiator	<b>-Wada Xaajood siiye</b> -Wada Hadal siiye -Gorgoriye
80. Networking	<b>-Shabakadeyn/Nidaam hawleed oo wada shaqaynaya</b>
81. Organization	<b>-Urur</b>
82. Over seer	<b>-Korjooge</b>
83. Over view	<b>-Dulmar/Guud Mar</b>

84. Participants	<b>-Ka-qayb-galayaasha/Kaqayb-qaatayaasha</b>
85. Perception	<b>-Faham/Dhugmo/Garasho.</b>
86. Performance	<b>-Waxqabad/Fulin Hawleed.</b>
87. Perspective	<b>-Ka eegid wajio kala duwan.</b>
88. Policy	<b>-Siyaasad</b>
89. Policy Maker	<b>-Siyaasad Dejiye</b>
90. Power Broker	<b>-Awood wax ku qabte/Awood adeegsade</b>
91. presentation	<b>-Soo Bandhigid/ Soo Jeedin</b>
92. Proactive	<b>-Ka hor degid/Qorshe Curiye</b>
93. Process	<b>-Geedi socod/Socodka</b>
94. Questionnaire	<b>-Weydiimo Qoran/weydiimo taxane ah/weydiimo Sahan ah</b>
95. Quorum	<b>-Tirada ugu yar ee shirku ku ansixi karo</b>
96. Rational	<b>-Maan-gal/Macquul</b>
97. Reactive	<b>-Falcelin/Arrin ku baraarug</b>
98. Reference	<b>-Tixraac/Raad raac</b>
99. Reflection	<b>-Milicsi/ Faham celin</b>
100. Resources	<b>-Khayraad.</b>
101. Revenue	<b>-Dakhli</b>
102. Role play	<b>-Door-jelid/Door ciyaarid/ Door Matalid</b>
103. Session	<b>-Fadhi/Kulan</b>
104. Shared Vision	<b>-Aragti wadaag</b>
105. Simple Majority	<b>-Aqlabiyad hal dheeri ah.</b>
106. Simulation	<b>-Iska yeelid/U ekeysiin</b>
107. Slums	<b>- Isku raran</b>
108. Solution	<b>- Xal/Furdaamin</b>
109. Stakeholders	<b>-Daneeyayaal.</b>
110. Strategic Plan	<b>-Qorshe istaratijiyadeed.</b>
111. Strategy	<b>-Istaratijiyad/Tab/xeelad</b>
112. Summary	<b>-Soo koobid/Khulaaso</b>
113. Symptoms	<b>-Astaamo/ Calaamado</b>
114. Systematic	<b>-Habaysan/Nidaamsan</b>
115. Technique	<b>-Farsamo/Xeelad.</b>

116. Training Design.	<b>Jaangoynta Tababarka</b> /Naqshadeynta Tababarka
117. Training Material.	<b>-Agabka Tababarka</b> /Qalabka Tababarka
118. Training Need assessment.	<b>-Qiimaynta baahida Tababarka</b> /Qiyaasida Baahida Tababarka
119. Transparency.	<b>- Daahfurnaan/</b> Hufnaan/Wax qaris laa'aan
120. Transparent	<b>-Daahfuran</b>
121. Unanimous	<b>-Loo dhan yahay</b> /Gidigood.
122. Vision.	<b>-Aragti fog</b> /Aragti dheer
123. Warm up exercise	<b>-Iskulalayn</b> /Qandicin/Is-diiran
124. Workshop.	<b>-Aqoon Isweydaarsi.</b>
125. Acknowledgment	- Mahad-celin/naq
126. Administrative Fixes.	<b>-Adeegsi</b>
127. Analysis	<b>-Gorfeyn</b> /Falanqeyn/Taxliilin/ kala shiidid.
128. Assignment.	<b>-Shaqo cayiman</b>
129. Assumption	<b>-Maleyn</b> /Si u qaadasho
130. Benchmark	<b>-Bar qiyaaseed</b> /Bartilmameed
131. Challenges	<b>-Caqabad</b> /Loolan/Hardan
132. Collective	<b>-Wadareed</b> /Urureed/Kooxeed
133. Conceptual frame work	<b>-Qaab-dhismeed-fikrad</b>
134. Constructive	<b>-Wax dhisid</b> /Dhismo-gal
135. Conventional Wisdom	<b>-Xikmad soo jireen ah.</b>
136. Corruption	<b>-Musuq-maasuq</b> /Laaluush.
137. Dilema	<b>-Laba daran mid dooro</b>
138. Diversity	<b>-Kala duwanaan</b> /Kala gedisnaan
139. Encouraging	<b>-Dhiiri-galin</b> /Geesinimo galin.
140. Fundamental	<b>-Aasaasi</b> /Asal.
141. Identification	<b>-Aqoonsi</b> /Tilmaamid/Baadi sooc.
142. Individual Contribution.	<b>-Wax ku darsi qof</b> /Gacan ka geysi qof
143. Infrastructure	<b>-Kaabayaal-Dhaqaale.</b>
144. Input.	<b>-Wax galin</b>
145. Insight.	<b>-Aragti Maskaxeed.</b>

146. Inspiration.	- <b>Maan-godlin</b> /Ra'yi fiican helid.
147. Interaction.	- <b>Isdhex-gal</b> /isla fal-gal/Isku dhafmid.
148. Judgement	- <b>Xukun</b> /Go'aan
149. Land Use Malaise.	- <b>Aafada dhul boobka</b> /Dhul ku habsa
150. Multipurpose	- <b>Ujeeddo badan</b> /Ujeedooyin kala duwan
151. Output.	- <b>Wax ka soo saarid.</b>
152. Potential Candidate	- <b>Musharax dihin</b> /Musharax iman kara
153. Pre-training.	- <b>Tababar horaad</b> /Tababar hortiis.
154. Priority	- <b>Mudnaan.</b>
155. Problem Solver	<b>Furdaamiye</b> /Xaliye dhib
156. proficiency	- <b>Xirfad Hanasho</b> /Aqoon sare u leh.
157. Public	- <b>Dan guud</b>
158. Public Sector.	- <b>Qeybta Dowladda</b>
159. Public Service	- <b>Adeeg guud.</b>
160. Regulation	- <b>Xeer Hoosaad.</b>
161. Self Governance.	- <b>Is-xukumid</b> /Ismaamulid.
162. Self Introduction.	- <b>Is-sheegid</b> /Is-tilmaamid.
163. Self study.	- <b>Wax- Isbarid</b>
164. Self Assessment	- <b>Isqiyaasid</b> /Isqiimeyn.
165. Shirinking Resources.	- <b>Khayraadka sii yaranaya</b>
166. Technical	- <b>Farsamo</b> /Farsamayn
167 Training needs.	- <b>Baahi tababar.</b>
168. Absolute Poverty	- <b>Saboolnimo</b>
169. Absolute	- <b>Gebi-ahaan</b> /Buuxda.
170. Application Commitment	- <b>Nidar-fulin</b> /Dabbaqaad ballan
171. Bureaucracies	- <b>Biroqoraadiyad</b> /Xafiisyad Dawladda oo shaqadoodu gaabis tahay
172. Caution	- <b>Taxadar</b> /Digniin.
173. Density	- <b>Cufnaan</b> /Jirmiga sheyga.
174. Environmental Degradation	- <b>Hoos u dhac deegaan</b> /deegaan burburin
175. Equilibrium	- <b>Dheeli-tir</b> /Is-le'eg
176. Hawker	- <b>Warato</b> /Dadka badeecada naadiya
177. Implication	- <b>Maldahnaan</b> /Hadal aan dhab loo muujin laakiin laga fahmi karo wajiga qofka.

178. Jurisdiction.	- <b>Hay'addaha Garsoorka.</b>
179. Legal Requirement.	- <b>Baahida Sharciyeed.</b>
180. Legislation.	- <b>Xeer Dejin.</b>
181. Legitimate	- <b>Sharci ahaan/La aqbali karo</b>
182. Matchmaker	- <b>Isku aadiye wax isku habboon</b>
183. Misinterpretation	- <b>Fasiraad xumo/Fasiraad qaldan</b>
184. Off-spring	- <b>Farac.</b>
185. Optimistic	- <b>Samo-filasho/Samo arag/Dhanka Wanaagsan ka eeg</b>
186. Partnership	- <b>Wadaag/Wada lahaansho.</b>
187. Pessimistic	- <b>Xumo arag/Xuma filasho/Dhanka xun ka eeg</b>
188. Phenomina	- <b>Ifafaalayaal.</b>
189. Professional	- <b>Xirfadle/Xeel-dheeri</b>
190. Recycle	- <b>Dib u warshadayn/Dib u nacfi galin</b>
191. Rules.	- <b>Qawaaniin/Xeer</b>
192. Status Quo	- <b>Xaalad taagan</b>
193. Stimulation.	- <b>Xiiso galin/Fi-fircooni galin.</b>
194. To Wear different Hats.	- <b>Xilqaad badnaan/Dowrar kala duwan qaata</b>
195. Waterpolution.	- <b>Biyo wasakhaw/Wasakhaw Biyood/dhiiqo</b>
196. Facilitator	- <b>Fududeeye</b>
197. Financier	- <b>Masuul Maaliyadeed</b>
198. Gender	- <b>Lammaane</b>
199. Negotiator	- <b>Gorgoriye/Wada hadal siiye.</b>
200. Overseer	- <b>Korjooge.</b>
201. Policy Maker	- <b>Siyaasad dejiye</b>
202. Power Broker	- <b>Awood Adeegsade.</b>
203. Institution Builder	- <b>Hay'ad dhise</b>
204. Leader	- <b>Hogaamiye</b>
205. Leadership	- <b>Hogaamin</b>

Fiiro gaar ah

In Each English word or term, the most common and acceptable Somali language definition is the first one, which is bolded.